




**UN-HABITAT**

**Barnaamijka Degsiimada Aadamaha  
ee Qarammada Midoobay**



**5. Xildhibaanka G/degaanka oo ah Fududeeye**

**Taxanaha  
Tababarka**



**Komishanka  
Yurub**



**Xildhibaanka  
G/degaanka oo ah**

**Fududeeye**

**Tilmaame-bare 5**

**Tababarka Hoggaanka la Doortay**

**Xarunta  
QM ee  
Degsiimada  
Aadanaha  
(Habitat)**

# **Xildhibaanka Golaha Degaanku Marka uu Yahay Fududeeye**

**Tilmaame-baraha 5aad**

## **Tababarka Hoggaanka La Doortay**

**X/dhibaanka  
G.Degaanku  
Markuu  
Yahay  
Fududeeye**

**Tarjumaddii: Jaamacadda Camuud**

**Istanbul, 1996kii “Shir Madaxeedkii Magaalada”**

**Taxanaha  
Agabka  
Tababarka**

\_\_\_\_\_

**Xarunta  
QM ee  
Degsiinada  
Aadamaha  
(Habitat**

## **Xildhibaan ka Golaha Degaanka Marka uu Yahay Fududeeye**

**X/dhibaan ka  
Degaanka  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

## **Tababarka Hoggaanka La Doortay**

**Taxanaha  
Agabka  
Tababarka**

**Sawirrada waxa iska leh Joel Elrod,  
Naqshadaha iyo jaan-goynta na Vicki Gillette**

**X/dhibaanka  
Deegaanku  
Marka uu  
Yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
La Doortay**

**iii**

**HS/711/04SO**

Sida lagu muujiyey natiijooyinka qiimaynta baahiyaha tababarka ee ay qabatay Xarunta Qaramada Midoobay ee Deegsiimada Aadamaha (Habitat), baahiyaha tababarka ee khuseeya madaxda (xildhibaanada) la soo doortay ee dawladda hoose, amase siyaasiyiinta dawladda hoose, waxa loo arkaa inay ku jiraan arrimaha caalam ahaan ugu muhiimsan, isla markaasna, ugu danaynta yar dhinacyada dhismaha waxqabadka ee horumarka dawladda hoose iyo maamulka Dawladda Hoose.

Sanadihii yaraa ee ugu dambeeyey, tiro dalal kala duwan ah, sida Nepal iyo Polland ama Uganda iyo Paraguay ayaa ku tallaabsaday markii ugu horreysay muddo tobanaan sano ah, meelaha qaarna weligood markii ugu horreysay, hawsha soo doorashada xildhibaanadooda deegaanka iyo duqaydooda magaalooyinka. Baahiyaha tababarka ee madaxda la soo doortay ee dawladda hoose waxay xagga sare ugaga jiraan ajendaha dimoqraadiyadaha munishiibiyooyinka cagaha loo taagay/dhismay, sida Ecuador, India iyo dalka Marykanka (USA).

Si wax looga qabto baahiyahan, Xarunta Qaramada Midoobay ee Degsiimada Aadamaha ( habitat) waxay hore u dhigtay oo ay tijaabisay taxanayaal buugag talobixineed oo tababarka ku lug leh si ay uga taageeraan xildhibaanada degaanka inay ka wakiillo noqdaan waddaniyiinta, siiyaan hogaaminta loo baahan yahay magaalo/dad ahaan ba, si hawlknimo leh ula shaqeeyaan dawladda dhexe iyo maamulka, farsamoyaqaanada iyo xirfadlayaasha sare ee shaqaalaha dawladda hoose iyo hay'adaha la halmaala. Buugagga hagitaanku waxay sharxayaan siyaasad iyo go'aan samayn, wadhadal, gorgortan iyo hoggaamin, kasoo qaybgelid, maamulid iyo qabasho shirar, hawlo wax u suurtageliya una fududeeya xubnaha golaha, maamulka maaliyadeed iyo arrimaha kale ee khuseeya.

Buugan hagitaanku, Xildhibaanada Deegaanku Marka uu Yahay Hoggaamiye, waa ka mid taxanayaal 12 ah waxaana loogu talagalay bilow ahaan inay ku isticmaalaan tababarayaashu hay'adaha tababarka waddaniga ah ee dawladda hoose amase unugyada/waaxaha tababarka ee ku dhexyaal dawladda hoose. Waxa iyana taageero dheeraad ah u noqday tababarayaasha ku dhaqmay buuggan, Xarunta Qaramada Midoobay ee Degsiimooyinka Aadamaha ( Habitat) waxay soo daabacday buugga kale (rafiqa) "Hagaha Tababaraha ee Tababarka Madaxda La Soo Doortay", kaasoo ka kooban qoraallo urursan oo tababaraha khuseeya iyo warbixino si buuxda/si gaar ah loogu diyaarshay inay ka faa'iidaystaan tababarayaashu markay qorshaynayaan aqoon is-weydaarsiyo ku lug leh saraakiil la soo doortay oo ku salaysan buugga talabixinta. Waxaan filayaa buuggan hagitaanku inuu si weyn wax uga taro xoogaynta dhismaha awoodda waxqabad ee dawladda hoose dhinaca unkidda dhaqamada hoggaaminta wacan, kaasoo ka mid ahaa ujeedooyinkii waaweynaa ee 1996kii Shirweynihii Xarunta Qaramada Midoobay ee Degsiimooyinka Aadamaha, Habitat II.

Waxaan damcay inaan uga mahadnaqo Dr. Fred Fisher iyo Mudane David W. Tees diyaarinta buuggan iyo qaar kale oo ku jira taxanayaasha iyagoo la kaashaday shaqaalaha Xarunta Qaramada Midoobay ee Degsiimooyinka Aadamaha (Habitat) Qaybta Tababarka ee ku taalla barnaamijyada tababarka ee Xaruntu leedahay taakulayntana ka heshay Dawladda Netherlands. Waxa kale oo aan rabaa inaan xuso wax ku darsashadii tababarayaasha iyo madaxda dawladda hoose ee Costa Rica, El Salvador, Kenya, Lithuania, Romania iyo Uganda ee naga tiiriyey tijaabada goobta-shaqada ee la xidhiidha murtida tababarka.

Dr. Wally N'Dow  
Kaaliyaha Xoghayaha -Guud  
Xarunta Qaramada Midoobay ee  
Degsiimada Aadanaha ( Habitat)

**X/dhibaan**  
**ku**  
**Degaanku**  
**Markuu**  
**yahay**  
**Fududeeye**

**Tababarka**  
**hoggaanka**  
**la soo doorto**

iv

## AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-du, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxa ka hawl-galay koox tarjumadda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka, Jaamicadda Hargeysa iyo Jaamicadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxa mudan Akaademiga Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

\_\_\_\_\_



**X/dhibaanku  
Degaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

**Qaybta 1aad**

Qormo la xidhiidha Xildhibaanaka Degaanku markuu yahay	
Fududeeye	
Qeexid	4
Soo-ururin	4
Milicsi	4
Aragtiyaha iyo Fikradaha	4
Madal-joogaha	5
Diyaar-garow iyo bilow	7
Madasha shirka	8
Tusmada xileed	8
Kaabidda xileed	9
In aad abbaar yeelato	10
Milicsi	10
Waa shirkaagii	11
Qaabaynta Shirka	12
Ciyaaryahanka kooxeed	14
Tani ma aha waxa ay doonayaan doortayaashaydu	17
Jawaabtu ma koox samayn baa	17
Milicsi	18
Maareynta xiisadda	18
Ogaanshaha sababta xiisadda	19
Istaraatejiyadaha xiisadda	20
Sahaminta kala-taggaanshaha	21
Maareynta mushkiladda	23
Tilmaamaha gebgebaynta	24
Qodobbo muhiim ah	24
Raad-raac	26

**X/dhibaanaka  
Degaanku  
Markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Qaybta 2aad:**

Aqoon-is-weydaarsi ku saabsan Xildhibaanaka Degaanku markuu yahay Fududeeye

Muuqaal guud	27
Leyli diyaar-garow: Maxaynu ku samaynaa sibidhka?	29
Qoraalka tababaraha	30
Tijaabo: Tusmada dhaqanka Fududeeyaha	30
Door-jilid: Diraasad xaaladeed Madaxbannaanaynta	
Suuqyada	30
Ka-shaqaysiinta Shirarka	33
Maareynta xiisadaha	34
Layli: Gudbin xirfadeed	41

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Tilmaame-barahan Tababarka ee XILDHIBAANKA DEGAANKU MARKUU YAHAY FUDUDEEYE, sidaa Tilmaame-barayaasha kale, siyaabo door ah ayaa loo adeegsan kara.

**Diraasad kuu gaar ah**

Qormada furintaanka u ah Tilmaame-barahan waxa loogu talo-galay wax-is-barid. Waxaad u baahantahay uun waxa weeye meel aan sawaxan lahayn, woxoogay wakhtiya iyo wixii aad wax ka qori lahayd. Natiijada ugu mudan si aad u heshid waxaan kugu dhiirigelineynaa inaad qorto jawaabahooda weydiimaha hadba ka soo dhexbixi doona qormada.

**Tababarka aqoon-isweydaarsiga:**

Tababraha casharadiisa (notes) iyo waxyaalaha layliyada ah (exercise materials) waxa loogu tallagallay iney isticmaalaan tababaryaal waayo-aragnimo leh. Si ay tababr aqoon-iswaydaarsiya ugu furaan xildhibaanno ka kala socda dawlada hoosaadyo kala duwan. Waxaanu ku soo daray (buug-gacmeedkan) hawlo kala gedisan oo waxbarashooyin ah iyo qaab-u-dhigaalyo si loo siiyo tababrayaasha awood ballaadhan oo ay u qaban karaan aqoon-isweydaarsi daboolaya baahida gaarka ah ee xildhabaanada ka qeybgalaya aqoon-isweydaarsiga. Waxa ay ahayd rabitaankayaga inaanu soo saaro buug-gacmeedkan si aanu kuugu dhiirigelino inaad ku soo darsato waayo-aragnimadaada tababarnimo si kor loogu qaado qiimaha tababarnimo (training values) ee agabyada ee ka qeybgalka xildhibaan hoosaayada iyagoo tababare ah. Waxaad go'aansan kartaa inaad isticmaasho agabyada ku yaal buug-gacmeedka sida ugu sugan ee ay u kala horeeyaan iyo qaabka loo soo kala gudbiyey. Ha yeeshee, haddana, haddii aad doorbidid dib ayaad u bedeli kartaa agabyada sida looga baahanyahay iney iswaafaqaan ahdaafta goobeed ee gaarka. Waxaad dooran kartaa inaad bixiso saddex saacadood oo tababar ah, adigoo isticmaalaya haldoorada leyliyada iyo hawlaha lagu soo daray buug-gacmeedkan, ama waxaad ku faa'iidayaan kartaa agabyada badan ee buug-gacmeedkan ku yaala taasoo ay ku ladhan yihiin tusmo adiga kuu gaar ah si looga dhererka barnaamijka ila iyo maalin dhan.

Buug-gacmeedkani waxa uu ka mid yaay 12 buug oo xidhiidha oo lagu tababarayo hogaaminta la soo doortay. Waa aad go'aansan kartaa amaba waa lagaa codsan karaa inaad qabato aqoon-isweydaarsi, kaa soo kaa raba inaad isticmaasho in ka badan mid amaba dhammaan buug-gacmeedyadani in ka badan muddo dheer oon aan la cayimin. Iyadoo buug-gacmeed kasta gaar ahaantii loo isticmaali karo ayaan uu haddana isticmaalka taxanahooda siin karaa ka qaybgalayaasha xildhibaan hoosaayadu ah waayo-aragnimo waxbarasho mideysan oo awood badan leh.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

## **Tababar kooxeedka:**

Agabyada kale waa la isticmaali karayaa iyada oo la doorbidayo kaalmada uu u geysan karo tababare xeeldheere ah ama fududeeye ahi si loo hormariyo waxqabadka xildhibaan hoosaadyada, kuwaas oo ka wada shaqeeya isku qeyb xukun. Marka ay tababare xildhibaan hoosaadyo wada shaqeyaan, waxa aynu rumeysanahay inuu fududeeyuhu diyaar u hayey inuu hagaajiyo hawlaha (activities) tababarka ee ku jira buug-gacmeedkan. Mar baa dhici doonta in adiga oo ah fududeeye aad dooratid inaad ku dartid hawshaadii kuwo cusub, taasina waxay ku xidhantahay marxalada markaa la joogo iyo sifooyinka ay ka leeyihiin kooxdu (ka qeybgalayaashu). Waxaynu rajeyneynaa in marka ay arrimahan oo kale dhacaan in aad u aragtid buug-gacmeedkan sidii “sanduuuqa yar ee tuulka” lagu gurto oo kale, isaga oo ay ku jiraan ama lagu hellayo fekaraddo khayaaro tababar (optional training ideas) badan oo lays dhexgelin karo, laysna barbardhigi karo (matched) dibna loo hagaajin karo (modified) amaba layska dhaafi karo sida xaaladani odhaneysa.

Waxaad haysata khayaaro badan oo aad ka doorneysid buug-gacmeedkan. Waxa aanu rajeyneynaa inaad si weyn uga faa’idaysan doontid.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

**Qaybta 1aad**

**Qormo**

**Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu  
yahay Fududeeye**

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

**Qeexid:**

Xildhibaan Degaaanku markuu joogo ama gudanayo doorka FUDUDEEYAHA wuxu dhiirri-geliyaa awoodda wadareed iyo xal-u-helidda mashaakilka qof-qof iyo koox-kooxba ee dadka dhex yaal.

**Soo-ururin**

Waxaynu eegi doonnaa qaabab door ah oo marka aad tahay Xildhibaan Golaha Degaaanka aad naftaada iyo kuwa kaleba ku caawin karto si loo gaadho yoolalka Goluhu higsanayo. Fududeeyuhu wuxu xirfad u leeyahay wada-shaqaynta kooxeed, (tusaale ahaan, kulammada oo uu ka dhigo wax-ku-ool iyo dhiirrigelinta wada-shaqaynta xubnaha kooxaha), dadka oo uu ka gargaaro maareynta xiisadaha iyo xal-u-helidda mashaakilka. Dhammaanba xirfadahaasi waa qaar qiimo leh, keliya ma aha markaad Golaha dhexdiisa xilkaaga ka gudanayso, bal se xataa marka aad mujtamaca dhexdiisa ka hawl gelayso adiga oo ah Xildhibaan Degaan oo la soo doortay.

**Milicsi:**

Marka aan naftayda uga fekero Fududeeye ahaan aniga oo ah Xildhibaan Gole Degaan iyo marka aan mujtamaca dhexdiisa ka hawl gelayaba, waxa maskaxdayda ku soo dhaca, waxyaabaha hoos ku taxan:

1.	_____
	_____
	_____
2.	_____
	_____
	_____
3.	_____
	_____
	_____

**Aragtiyaha iyo fikradaha**

Isticmaalka ereyga “fududeeye” si uu u tilmamo dabeecado gaar ahi, waa wax cusub. Dhinaca kale marka se lage eego, waxaad moodaa in uu waqti yar ku kasbaday aqoonsi ballaadhan oo caalami. Doorka fududeeyuhu wuxu ka soo billaabma wada-shaqaynta kooxda ama xidhiidhka dhaqdhaqaaqa ee beni’aadanka, waxaanuu si dhakhso ah ugu fiday isticmaalkiisu adeegga beni-aadanka iyo fagaarayaasha maareynta, isaga oo noqday xirfad u qalanta in la adeegsado. Meel kasta ha ka soo bilaabmo ama adeegsigiisu ha gaadhsiisnaado e’ Xildhibaan Golaha Degaaanku markuu yahay Fududeeyuhu, wuxu mudnaan ku leeyahay fagaarayaasha siyaasadeed. Waxa kale oo aynu rumeysan nahay in ay hoggaamiyayaasha la soo doortaa in badan ku soo dhaqmeen xirfaddan si ay u noqdaan wax-tar iyo in mar kale la soo doortaba. Qaar badan oo idin ka mid ah tani waxay u noqonaysaa wax aan ku cusbayn. Qaar kalena waxa laga yaabaa in

**X/dhibaan  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

ay u noqoto fure ay u adeegsadaan kordhinta wax-qabadkooda ee shaqo iyo in ay si wax-ku-ool ah uga dhex shaqeeyaan kooxaha ay hawl-wadaagta yihiin. Waxa ugu horreeya ee inaga hor imanayaa waxa weeye halkii aynu ka jeexi lahayn khadka u dhexaynaya waxa aynu wadaagno ee ku saabsan kaalintan iyo waxa aynu ka tagnay ee aan la sheegin. Tirsiyo Buugaag ah ayaa laga qoray xaaladaha ama duruufaha kala geddisan ee uu Fududeeyuhu door la taaban karo ka qaadan karo. Maa daama aanay waaqici ahayn in doc kasta oo fudeydeeyuhu ka hawl geli karo la tixi Karin, waxa aanu qorshaynay in aanu isku soo koobno meelaha aanu is-leenahay si fiican ayay u tilmaami karaan doorka Fududeeyaha ee Xildhibaanaka Golaha Degaanka ee la soo doorto. Marka laga eego waayo-aragnimadayada, iyo wixii aanu ka soo dheegannay qiimeynii aanu ku sameynay doorkaaga Fududeeyaha, waxaanu ku ekaan doonnaa qodobbada hoos ku taxan:

1. Sida loo socodsiiyo (loo fududeeyo) Shir ka sii wanaagsan kuwii hore;
2. Sidii aad Golahaaga Degaan uga caawin lahayd in uu koox ahaan u hawl-galo si wax-ku-ool ah, adiga oo rumaysan in qaar idin ka mid ahi aamminsana yihiin in aan qaabkan loo hawl-gelin;
3. Sidii aad gacan uga geysan lahayd maareynta dhibaatooyinka qofafka iyo kooxahaba dhex mara;
4. Sidii aad dadka kale uga caawin lahayd sidii ay dhibaatooyinkooda u maareyn lahaayeen;

### **Madal-joogaha**

Miyaynu ku hagaagsan nahay malaha ah waqtiga aad ku bixiso hawlaha/shaqada Golaha Degaanka in ay tahay ta aad ku qaadato Shirarka? Intee in le'eg ayaad ku qanacsan tahay waxyaabaha/natiijooyinka shirarkaa ka soo baxa? Ma kaa maqallay in shirarkaas tegistoodu inta badan ay ahayd waqti-lumis? Haddii se ay haddaba sidaas tahay, ma laga yaabaa in ay daw tahay in adiga iyo saaxiibbadaa arrintan waqti-lumiska idiin ku muuqatay wax ka qabataan? In la yidhaahdaa ka fudud in la qabto ama odhaahdaa wax-qabadka ka fudud. “Waayo” ayaad is-weydiisaa? Waxaanu tuhunan nahay in ay dhowr sababood jiraan, ha yeeshee ta ugu weyni waxa laga yaabaa in ay tahay rabitaankayaga ah in aanu oggolaanno SHIRARKA XUN-XUN – Shirarka WAQTI-LUMISKA AH – waayo inta badan sidaas ayay ahaayeen. Waxa laga yaabaa in aad tidhaahdo, “Waa mid ka mid ah qiimaha qof weydaarsado in uu noqdo Xildhibaan la soo doortay.” Ha yeeshee, haddana waxa kuu suurto-gal ah in aad jebiso derbigaa oo aad iska dul qaaddo ceeryaanta iyo qiiqa kugu meersan ee kaa fogaynaysa xaaskaaga isla markaa na ka ilaalinaysa qof kasta oo kaleba in ay xaqiijiyaan wixii ay filayeen in ay gaadhaan.

Ka-hor inta aanad ka fekerin waxaad ka qaban karayso in aad ahaato “Madal-jooge” tamariya ama ka fiican kii aad hore u ahaan jirtay, bal aynu hal ama laba il-bidhiqsi ku qaadanno si aynu u astaynno dhibaatooyinka sadheeya<sup>1</sup> Shirarka, guud ahaanba aduunka:

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

<sup>1</sup> Xumeeya ama kharriba. Badanaa ereygan sadhayn waxa lagu isticmaalaa markaa cudur ama xanuun faafo ee uu dad ama xoolo badan ku dhaco. Waa ereyga ugu dhow ee lagu tarjumi karo ereyga ingiriisiga ah ee “Plague”



- § Yoolalka iyo filashada Shirarka oo aan caddayn;
- § Xil-qaad la'aan/iyada oo aanay cidina mas'uul ka ahayn;
- § Ajende la'aan ama Ajendaha oo aad u dheer oo aanu qofna filanaynin la dhammeeyo;
- § Doodda shirka oo qodob ilaa qodob kale ku meeraysata iyada oo aan wax xidhitaan ah qodob na loo yeelin ama samaynba;
- § Dadka oo mar qudha wada hadla;
- § Mar walba waxaad fadhida meel aanad ka arkayn waxa socda;
- § Qof keliya ayaa inta badan hadalka/doodad wada qaata;
- § Waxaad dareentaa in la iska kaa wato – wax lagaa saxeexanayo ama shaabbadaysanayo; waxa laga yaabaa in ay saacad dhaafto waqtigii Shirka lagu ballamay oo weliba aanay Madasha iman kala-badh dadkii ka soo qayb-geli lahaa;
- § “Ma jiraa qof arkay Guddoomiyihii Shirku;”

Miyaanay qodobbadaani caqli-gal ahayn? Waa hubaal, maxaa se laga qaban karaa dhibaatooyinkan? Halkan waxaanu ku soo jeedinaynaa talooyin maaro u noqon kara sidii shirarka loo hagaajin lahaa. (Waxaanu kaga hadli doonnaa qormadan shirar aad tagtay oo ka baxsan ama dibedda ka ah Golaha Degaanka. Maa daama ay fadhiyada rasmiga ah ee Golaha Degaanka uu xeer qeexayo, xeerarkaasina ay dalalka adduunku ku kala geddisan yihiin, tababarayaashiinna ayaanu u deyn doonnaa si ay idiinka caawiyaan shirarkaasi.)

Bilow in aad is-weydiiso su'aalahan qumman, ka-hor intaa aanad go'aansan in aad ka qayb-gasho shir lagugu marti-qaaday. Tusaale ahaan, bal waxaad is-weydiisaa:

- § Maxaynu u shiraynaa? Maxaynu rajeynaynaa in aynu ku gaadhno shirkan?
- § Ajende rasmiyi ma jiri doonnaa? Ajendaha nuqul ma ka heli karaa inta aanu shirku furmin?
- § Yaa kale ee shirka lagu marti-qaaday?
- § Maxaa la iga filayaa in aan shirka ku kordhiyo? Miyaa la iga rabaa in aan agab iyo qoraallo u soo qaato shirka?
- § Waqti intee le'eg ayuu shirku soconayaa?
- § Yaa ka mas'uul ah in uu shirka isugu yeedho? Yaa se guddoominaya?
- § Ka-qayb-galkaygu ahmiyad intee le'eg ayuu shirka u leeyahay? Maxaa se dhacaya haddii aan ka qayb-geli waayo? (Waxaa laga yaabaa inaad doonto in aad su'aashan ugu danbaysa is-weydiiso haddiiba ay kuugu muuqato in si qaldan loo tarjunto ama loo qaatoba.)

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

**6**

Bal aynu si kooban u eegno qaar ka mid ah su'aalahan innaga oo si qoto dheer ugu dhaadhacayna. Marka aad tahay Sarkaal la soo doortay, waxa muhiim ah in aad ogaato waxay shirkan kaa filayaan kuwa qabtay. Ma waxay kaa filayaan in aad weedh rasmiya ka jeediso? Ma waxay kaa rabaan go'aan aad ku dhawaaqdid? Haddii ay sidaa tahay, ma habboon tahay tani markaad wakiil ka tahay ama masilayso xubin qudha Golaha Degaanka ka mid ah? Xildhibaan kale ma la marti-qaaday? Haddii aan la marti-qaadin, tani ma ku keeni kartaa dhibaato xidhiidhka idiin dhexeeya adiga iyo saaxiibbadaada kale ee aad Golaha ku wada jirtaan?

Ka dib marka aad hesho jawaabaha su'aalahan, waa in aad go'aan ka gaadhi kartaa in aad waqtigaaga iyo aqoontaadaba u huri karto ka-qayb-galka shirkaa. Haddii aad helli kari weydo jawaabo qumman, ha yeeshee weli aad

u malaynayso in uu shirku u qallmo in la tago, markaa waxaa laga yaabaa in aad doontid in aad ku dhiirri-geliso kuwa shirka qabanqaabinaya in ay waqti badan siiyaan diyaarintiisa. Waa in aad si sugan oo qeexan u tilmaantaa waxaad rabtid in la qabto. Iyada oo ay taasi ku xidhan tahay sida aad codsigaaga u dhiibato, ayuu haddana qofka aad la xidhiidhay jeclaysan doonaa talada wax-tarka leh ee aad u soo jeedisay.

### **Diyaar-garow iyo bilow**

Waxaad gaadhay go'aan ah in aad ka qayb-gashid shirka. Hadda waxaad u baahan tahay in aad diyaar-garowdo. Hadduu shirka yahay mid warar la isku dhaafsanayo/wadaagayo, diyaar ma u tahay inaad adna wax ku darsatid? Mise waxaad qorshaysatay/ku-talo-gashay in aad dhegaysatid oo keliya? Haddii ay sidaa tahay, waxaad qoran kartaa qodobbo ku saabsan waxaad shirka ka filanayso in ay ka soo baxaan. Haddii uu shirku yahay mid go'aan lagu gaadhayo, diyaar ma u tahay in aad go'aan-qaadato amaba aad ka mid noqotid koox go'aan qaadanaysa? Waa su'aal muhiim ah markaad metelayso Degaan. Haddii ay Xildhibaan Degaan oo kale ay ka qayb-gelayaan shirka, waxa laga yaabaa in aad doontid in aad la sii falanqeyso Ajendaha inta aan shirka la bilaabin ama aad la gorfayso Ajendaha dad aad rumaysan tahay in ay ahmiyad u leeyihiin naatiijada shirkan.

Ugu yaraan hal tallaabo ka sii horree ama ka-hor-deg qabanqaabiyayaasha shirka si aad uga digtoonaato haddii ay yeelan karaan "Ajende qarsoon". Tixgeli caadooyinka, qawaaniinta amaba shuruucda/xeerarka iyo dhaqammada la dhowro mararka shirarka la tegayo. (Tusaale ahaan, ha iman shirka adiga oo gashan surwaal jiinis ah iyo garan halka ay ka-qayb-galayaasha kale uga lebbisan yihiin si rasmiya, sida suudh iyo qoor-xidh oo kale.)

Goor hore kaalay si aad u sii hagaajiso kuraasta iyo miisaaska haddii ay taasi wax ka tarayso baahiyaha iyo werwerka aad qabto. Ma wax doqonniimo ah ayay kuu la eg tahay? Waa laga yaabaa in ay u eg tahay, ha yeeshee, haddana waayo-aragnimadayadu waxay na faraysaa in qaabka kuraasida iyo miisaska loo dhigaa ay saamayn laxaad leh ku leedahay naatiijada shirka. Tusaale ahaan, haddii laga shirayo xallinta muskhkilad xun oo dhex taal reerro deris ah, waxa muhiim noqon karta in kuraasida loo dhigo qaab ay dadku ugu kulmaan ama isugu arki karaan kooxo yar yar si ay uga arrinsadaan siyaabaha ay mushkiladda u maareyn lahaayeen. Hadduu shirku yahay mid adag oo la iskaga hor-imanayo, waxa laga yaabaa in aad doontid in aad fadhiisato meel aad si fiican uga weerari kareyso kuwa kaa soo hor jeeda. In kasta oo ay dhaqammadaasi dal ilaa dal kala duwanaan karaan, haddana meelo badan marka laga eego adiga dan kuu ma aha in aad fadhiisato xagga danbe ee qol dheer oo cidhiidhiya oo weliba tiirna kugu

**X/dhibaan  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

gudban yahay oo u dhow daaqad u furan sawaxanka iyo qaylada suuq gaadiidku aad u maro.

### **Madasha Shirka**

Tegitaankaaga goor hore waxa kale oo uu ku siiyaa fursad aad kula sii kulmi kareysid dad kale oo mudan oo iyaguna shirka kaa la soo qayb-galaya. Haddii ay muhiim tahay in aad ku sugnaato meel aad awood iyo kormeerba ku yeelan karto, fadhiiso meel aad ku kasban karaysid fursad saykoolajiyadeed oo faa'iido kuu leh. (Tani, waxa laga yaabaa in aanay mushkilad kugu noqon maa daama aad ku timid sharafta xafiis la soo doortay, ha yeeshee waxa habboon in aanad u qaadan wax jid/daw ah oo aad mar kasta heli karto.) Ku dedaal in aad shirka uga qayb-gasho si buuxda oo aad tamartaada ugu roon ku deeqayso.

Innaga oo ilaa hadda u haysannay in aad tegeyso shir cid kale kugu marti-qaadday, haddana qodobbadan aynu soo qaadnay oo dhambi waa qaar munaasib ku ah markaad adiga qudhaadu shirka mas'uul ka tahay ama aad waddo. Doorkaagu wixii uu doonaba ha noqdee, halkan waxaanu kuugu soo gudbinaynaa xilal dhowr ah oo faa'iido kuu leh oo aad ku shaqayn karto:

### **Tusmada Xileed**

- ∄ War/ra'yi keene: Waxa tan ka mid ah bixinta warka amaba fikradaha ka caawinaya kuwa kale in ay helaan ama gaadhaan ujeedooyinka shirka, iyo ka- raadinta wararka iyo fikradaha inta ka maagaysa ama aan ku dhiirranayn in ay wax ku darsadaan shirka intuu socdo;
- ∄ Caddeeye: Imisa jeer ayaad tagtay shir oo aad ogaatay in aanay qodobbada qaarkood caddeyn oo aanu qofnaba doonayn in uu ka hadlo oo la caddeeyo. Su'aal caddayn ah markaa oo la is-weydiyo ayaa laga yaabaa in ay doodad halkeedii ku soo celin lahayd isla markaana ay qof walba waqtiga u madhxin lahayd;
- ∄ Faah-faahiye: Mararka qaarkood fikrad amaba talo-bixin ayaa laga yaabaa in loo baahdo in la faah-faahiyo si ay cid waliba u fahamto. Caddeynta ama faah-faahintu waxay wax ka tartaa oo ay kaa caawisaa in aad wax ku dhisto/salayso ka-qayb-qaadashada xubnaha shirka yimid, waxaanay cabbir u tahay is-gaadhsiinta madasha shirka dhexdeeda ka socota;
- ∄ Soo-ururiye: Weligaa ma tagtay shir markii laga soo baxay ay dhacday in aanu qofnaba xusuusan wixii lagaga hadlay? Tani waxay sida caadada ah dhacdaa marka aanu qofnaba waqti iyo dedaal midnaba u hurin soo ururinta wixii la yidhi. Haddii ay jiraan sabuurad amaba qaab wax loo daabacaa ka faa'idayso. Soo- ururintaadu way ka wax-tar badanaan kartaa marka inta la qoro loogu diro qof walba halkiisa si uu arko/akhriso wixii laga hadlay;
- ∄ Ku-heshiin: Had iyo goor shirarku in badan ayay sii socdaan ka dib marka iyada oo meel wax la isla dhigay, waayo cidina ma ay hubin amaba xaqiijin in ay xubnuhu diyaar u yihiin in ay go'aan-qaataan. Su'aal yar oo keliya sida "Miyaynu diyaar u nahay in aynu go'aan-qaadanno?" ayaaba shirka hore u marn karta Ha ka maagin in aad xubnaha ka dalbato in ay go'aan ku heshiidaan, marka ay kuu muuqato go'aan-qaadashadaa heshiiska ku iman kartaa;

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Dhammaan xilalkaa aynu dib u eegnay, waa waxay xeel-dheerayaasha hababka kooxeed u yaqaanaan Tasmada Xileed. Waxa loogu talo-galay in ay kooxaha ka caawiyaan sidii ay ula tacaali lahaayeen hawlaha markaa taagan, sidii go'aan loo gaadhi lahaa, sidii loo bixin lahaa wararka amaba fikradaha u baahan falanqaynta, sidii loo xallili lahaa mushkilad taalla, iyo sidii loo maareyn lahaa xiisad oogan. Dhammaan shaqooyinka ku abbaaran hawlahaasi waxay xidhiidh la leeyihiin arrimaha ay ka midka yihiin “Maxaynu halkan u joognaa/maxaynu u baahan nahay in aynu qabanno” iyo waxyaabaha la midka ah.

### **Kaabidda xileed**

Waxa kale oo jira shaqooyin ka caawiya kooxaha iney abuuraan xikhiidh sii wanaagsanaada oo dhexmaraya xubnaha, iyo sidii ay xidhiidhkaasi u sii haynlaahaayeen in doora. Kooxuhu waxay u dhawdahay iney guul ka keeni waayaan arrimaha u dhexeeya ashkaasta kooxuhu waxay u janjeedhaan inay hanan kari waayaan inay wax ka qabtaan arrimaha u dhaxeeya qofqofka. Kooxihii soo wada shaqeeyey in muddo ah waxa ay yihiin amba ay noqdaan sidii baabuur yar oo duug ah. Haddii aanad hagaajin joogto ah ku wadin, waa hubaal baabuurkaasi waa uu sii burburayaa. Sidaa oo kale kooxda wada shaqeysaa waxa khuseeyaa waxa weeye arrimaha odhanaya “waar-sidee-begnu-u-wada-shaqeynaa?”

**Gaadh-haye (Hadal-qaybiye):** Immisa jeer ayaad joogtay shir ay qof amaba laba hadalka ka bixi waayeen iyada oo ay kuwii shirka wax qiimo leh ku kordhin lahaa ay aamusan yihiin? Marka ay tan oo kale dhacdo, waxa muhiim ah in la helo qof iska dhiga sidii Gaadh-haye si loo helo dad badan oo iyaguna doodda ka qaybqaata.

š **Dhiirriye:** Mararka qaarkood gaar ahaan sida shirarka ka dhacda degaammada deriska ah, sabao jira awgood ayay dadka qaar uga maagaan in ay fikradahooda ku darsadaan doodaha, waxa muhiim ah markaasi in la dhiirri-geliyo si codkooda loo maqlo. Mararka qaarkood dhiirri-gelintani waxay u fududahay sidii codka la maqlay iyo qofkiisa la isugu soo sooci lahaa isla markaana dadkaasi loogu xaqiijin lahaa in ay codkoodii aqbaleen xubnihii shirayay.

š **Dhex-dhexaadiye:** Shirarka guud waxa mararka qaarkood ku dhici kara burbur ah dhinaca wada xidhiidhka. Waxay bilaabaan xubnuhu in ay murmaan ama ay kala baxaan iyada oo uu mid waliba ku ekaanayo xaaladdiisa u gaarka ah halkii uu ka caawin lahaa kooxda in la qabo wixii la isugu yimi in la dhammeystiro. Iyada oo uu ismaandhaaf amaba kala fikradi ay u fiicnaan karto shirarka, ayaa haddana loo baahanyahay in diiradda la saaro hawsha ee aan la saarin ashkhaasta (iyo wixii ay sameynayaan).

š **Nadiifiye:** Weli ma tagtay shir ay hadheeyeen buuq iyo cadho, amaba si cad ma laysaga kaa hortaagay wixii aad qaban lahayd dabeetana xalkii keliya ahaa ee mashkiladan ma u aragtay inay tahay “gurigi xaadhis – waxa aynu aragney xildhibaan hoosaad gaadhay heerkan wax soo saar la'aanta ah oo ka soo horjeeda wax soo saarka – Halkii laga sugi lahaa dadka wax doortaa iney “guriga xaadhaan” wakhtiga doorashada – waxay noqotay iney xildhibaanadii soo gallay meeshan

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

ay intay xaaqinta qaataan ay iyagu gurgood xaadhaan. Tani wax ay dhacaysa markaa aad dooneyso inaad dhiiranaato, marka aad dooneyso inaad inta aad talaabada hore qaado aad tidhaahdo, “whoa”waar u kaadiya/waar bal eega waxa halkan ka dhacaya” waxa aydin eegaysaan waxaydin ka gaadhaysaan go’amadii aydin qashinka meeshaa uga saari lahaydeen. Waxa aydin qireysaan markaa ineydaan si fiican u soo wada shaqeynin, aydina markaasi u baahan tihiin ineydin sameysataan hab miqyaasa oo cusub oo uu waxqabadkoodu ka duulayo.

### **In aad abbaar yeelato**

Markii si ficil ah loogu tijaabiyey goobta shaqada asalka qoraaladda buugtan taxanaha ah, xubnaha Golaha deegaanku waxa ay soo jeediyeen in aan ku kabno fikrado kale oo wax ku ool ah oo ka hadlaya qaab dhismeedka guddiyada golaha deegaanka dhexdooda, iyo qaar iyaguna ku saabsan kulamada lala yeelanayo kooxa bulshada, iyaguna qaar ka hadlaya isku xidhka shaqo ee ururada bulshada. Kulamada guddiyada golaha deegaana waxa laga yaabaa in ay xukumaan sharciyada iyo awaamiirka kale ee waafaqsan xilka ay u hayaan ummadda soo doortay ee hawsha ay hayaan u igmatay. Arrinta muhiimadda kowaad leh ee loo haaban yahay in aad fahmto waxa ay tahay marka ay joogto xaga Guddi ahaan shaqaddaada, in aad isweydiiso, maxaa la iiga baahan yahay? Maxaase aan khusayn? Tusaale: ma loo baahan yahay in ay guddiyadda goluhu yeeshaan kulamo loo qabanaya xilliyo ay wakhtiyo u kala dhexeeyaan? Haddii aanay sidaasi kula ahayn, oo aad rumaysan tahay ama qabto fikradda ah, in la qabto shirar badan waxa markaa ku horyaala in aad isweydiiso in aad u baahan tahay in aad la timaado awooda qorshe oo ku dhac geesinimo leh, ee shirarka isdaba jooga ah lagu yeelan karo. Dhanka kale, ma yihiin shirarkaasi, kuwo u midho-dhala, sida aad jeclayd in ay noqdaan?

Haddii ay taasi dhici weydo diyaar ma u tahay in aad guddoomiyaha kala shaqayso in qaab ahaan la kordhiyo horumar laga gaadho, shirarka noocaasi ah. Su’aal kale, oo ku quman in la isweydiiyaa waxa ay tahay ma yihiin shirarkaasi kuwo ku socda hannaanka diimoqraadiyadda? Xubin kasta oo ka mid ah guddiyadda golaha ma la siiyaa fursad uu fikirkiisa/fikirkeeda ku cabirro, mise hogaanka shir guddoonka ama qaar kale oo rasmi ahayn ayaa aan xaqsoor ahayn ay wax u qoondaysa? Guddiyadda goluhu ma ka yihiin saraakiil Dawladda hoose oo quman, sidaas darteed waxa uu guddigaagu heleyaa war iyo falaanqeyn marka la isaga baahdo? Waxa jiri kara su’aalo kale oo badan, oo aan ka soo jeedin karo arrimahaasi, balse waxa aad moodaa, in la joogo wakhtigii aad ku muujin lahayd, waayo-aragnimaddaada qorsheynta qaabka dhismo ee guddiyadda.

### **Milicsi**

Ka xubin ahaan golaha deegaanka, sidee ayaa aad u aragtaa qaab dhismeedka guddiyadda golaha ee loo qorsheeyey go’aan ka gaadhida hawlaha golahaas? Miyaa aad u bogtay, sida loo habeeyey? Bal ka warran sida ay ku la yihiin wax qabadka meemarka ah ee hawlaha guddiyadaasi ka soo baxay? Ka sheeke, kaalintaadda aad ka qaadata, marka ay shirarka guddiyadaasi jiraan?

Haddaba, haddii ay jawaabta su’aalahaas; qaar tabban yihiin bal waxooga wakhti ah oo yar sii arrinta, si aad u muujiso waxa aad ku saluugtay, kana fikir sida kuwo

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

waxtar leh oo ku raaligeliya aad heerkooda u gaarsiin lahayd shirarkaasi guddiyadda golaha deegaanka.


Shaqadda ka dhexaysa ururadda bulshada iyo isku-xirnaanta dhafan ee shaqo ee ururadda bulsho, waxa ay ku xidhaan karaan, si laxaad leh, dhaqan deegaanka ee u yeedhinaya kulamadan iyo kuwii ka horreeyey ee ay sameeyeen xildhibaanadii hore. Markaynu intaa nidhaahno waxayno rabnaa inaynu si dhakhso ah u tusno in aanad u baahnayn ee kuwii hore ku soo xidhaan. Loo ma baahna inaad ku tashato wixii aasaasi ah ee horta jiray, waxa fikrad qumman ah, in aad karaamayso waxqabadka bulshadda ku dooratay, taasoo looga tibaax qaadanayo waayo-aragnimadda xilliyaddii hore. Intaa marka aad ogaato, ayaa ay kuu sahlan tahay in aad wax ka beddel ku riddo ama aad horumarin ka gaadho hawlaha kooxaha wada shaqaynta isku leh ama shaqo wadaaga yihiin xildhibaanadda la soo doortay ee golaha deegaanka.

**Waa shirkaagii**

Ka hogaamiye la soo doortay ahaan waxa aan ka soo qaadaynaa in aad tahay, hormoodka noocyadda kala, duwan ee shirarka danaha ummadda. Ha noqdeen kuwa hawlaha golaha, ka guddiyadda kale duwan, guddi hoosaadyadda, kuwaasi guddoomintooda, ama shirweyne bulsho oo aad gadhwadeen ka tahay ba?

Sida qaalibka ah qoddobaddaasi aynu taataabanay waxa ay tasmeynayaan in ay gacan kugu siinayaan, sida aad ku fullin karto xilka aad adigu horyaalka ka tahay. Inta badan hawsha iyo faro ku haynta socodsiinta shaqo waxa si fudud loo dabaqi karaa marka aad tahay masuulka ee aad leedahay hal laakin. Kol hadii aad tahay shirguddoomiye, waxa ku horyaala xil adag oo fikir joogta ah u baahan.

Haddii aan intaasi, sidaasi ku dhaafno, waxa laga yaabaa in aad u baahato, in aad hawl waddeenaddaada ama saaxiibaddaa weydiiso, sidii aad u sugi lahayd, arrimaha loo baahyahay, si aad soo dhaxgal ugu yeelato joogtaynta isku xidhka xoogaga shaqadda.

Su'aalaha aynu soo jeedinay bilowga doodan, ayaa ku habboonaan kara, dib-u-eegida arrimaha aan kor ku xusnay, balse, aan immika fiirino habka uu machadka arrimaha dhaqanka ee marka magaciisa la soo gaabiyo loo yaqaan (ICA), uu ugu talloalay, sida meel mar looga dhigo shirarka golaha deegaanka.

**X/dhibaanaka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Machadka arrimaha dhaqanka ee (ICA), waxa uu ka hawlgalay dalal badan oo dhaqamo kala duwan leh, waxana aan ka faa'iidayaan karnaa waayo-aragnimadii uu helay ama ka kasbaday dalalkaasi.

Arrimahaasi waxa ka mid ah qoddobaddan soo socoda: Halkan (1) mudaha deegaanka oo ah fududeeye (2) u tababarashadda hogaaminta la soo doortay.

### **Qaabaynta Shirka**

Machadka ICA wuxu jecel yahay waxa loo yaqaan, ama xuruuf gaaban, kuwaasi oo la isku dhafay si uu u xoojiyo una fududeeyo in ay dadku arrimahaan aan ka hadlayno si ay dhib yari ugu xusustaan. Ereyada la soo gaabiyay ee afka Ingiriisiga ku noqonaya STEPS oo aanu halkan hoose idiin ku tarjumi doonno, ayaa dadka u fududeeya qabashada shirarka. STEPS, waxay u taagan tahay ama laga soo dheegay ereyada Ingiriisiga ah ee:

- € Space: Goobta,
- € Time: Waqtiga shirka,
- € Eventfulness: Dhacdooyin cogan,
- € Product: Natiijo,
- € Style: Hannaanka,

Bal aan si qoto dheer marba qodob u qaadanno:

**Goobta:** Goobta lagu qabannayo shirku, waa muhiim. Waa in aad is-weydisaa ma ku habboon tahay ka-soo-qayb-galayaasha shirka? Waa in aad ka fiiriso xagga ballaadhka.

Waxa habboon in uu qolka shirku noqdo mid falal ah, si ay dadku u xiiseeyaan waxa shirka lagaga hadlayo waxa habboon in aad isa su'aasho ma tahay meel raaligelin karta dadka shirka imaanaya? Waxa loo baahan yahay in aad ka fiirso dhinacyo badan, sida wax dhaqan ahaan ama diin ahaan ka qaybgalaayaashu ay xasaasi ka noqon karaan.

Goobtu, ma leedahay fadhiga iyo maacuunta ku habboon adeega danaha shirka? Haddii aad doonayso in ay ka qaybgalayaashu qabtaan shaqo mushkilad – xalin ah, waxa aad u baahan kartaa miisas, sabuurad, iwm. Waxa jira arrimo kale oo mudan in laga fikiro, marka lagu eego waxyaabaha muhiimka ah, ama la taaban karo. Cid kale ha u xilsaarin arrimahaasi, haddii aanad mid mid si ballaaran isugu afgaranin.

**Waqtiga** - Qorshaynta wakhtiga la qabanayo shirka, muddada uu qaadanayo, sida ay dhacdooyinku u kala horeeyaan ama isugu xig xigayaan iyo ku shaqaynta jadwalka shirku, waa arrimo muhiin ah:

Badanaa ama sida qaalibka ah, waddamadda islaamka ah qorshaha lagu ma darro, in shirka la qabto xilliyadda danbe ee maalmaha Jimcaha. Dhinaca kale saacadda ugu horaysa ee labada saacadood ee shirka qoddobka ugu horeeya ee ajandaha shirk lagu ma meeleeyo, hadii qoddobo badan lagaga hadlayo shirka, haddii ayna arrintaasi muhiimad ka wada weyn qoddobadda kale lahayna, wakhti badan aanay qaadanaynin.

Marka ay sidaasi ku qabsato, waxa laga yaaba in aad u baahato jadwal ah in aad qabato labo shir. Marka laga shirayo arrimaha noocan oo kale ah, waxa loo

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

baahan yahay in aad waxooga xarakayso si uu mid muuqaal iyo maqaan gaara leh u noqdo.

**Dhacdooyin cogan:** Machadka Caalamiga ah ee qaabilsan arrimaha dhanqanka ee magaciisa loo soo gaabiyo ICA, waxa uu culays saaraa xubnaha ay tallaabooyinkani yihiin si ka culus habkeenan, hase yeeshee, taniba waxa ay leedahay muhiimadeeda. Bal aan guda galno arrinta, shiraka qaarkood ma aha kuwo dhan dhacdo ahaan. Shirarkaasi ma aha kuwo dhacdadoodu muhiimad ahaan ay hal door ku leedahay figta sare ee wakhtiyada waayo aragnimada noloshiina kuwaasi oo si hoose xasuustoodu maskaxdeena ugu daabacan tahay. Dhinaca kale, waxa jira dhacdooyin kulamada lagu gorfeeyo oo dadka qaar micno u leh sida furitaanka xarun cusub ee dariskooda, amaba dadaal lagu kobcinayo qorshe fog oo lagu abyayo danaha beesha. Xaaladahaasi, marka arrintu taagantahay waxa muhiim ah sidii aad uga fakirilahayd in aad olole wacyigalin ah shirkaasi ugu durbaan tunto si aad uga dhigto in uu qiimo ahaan taasi mudan yahay.

**Natiijo:** Waa maxay go'aammada aad filayso in ay shirka ka soo baxaan? Haddii aanad ogayn hadafyo gaar ah oo cad oo shirka lagu qaadaa dhigo waxa kugu adkaan doontaa in aad ka gaadho heer ay go'aano waxtar lehi ka soo baxaan. Haddii la raaco mahmaadda hore loo yiri oo ah mid meesha qabata, taasoo odhanaysa "nin aan tubta safarkiisa ka war heynin, waa nin had ba tuur iyo tog fuulaya". Ka midho-dhalinta shirku, waxa ay ku xiran thaya, waxa aad damacsan tahay in lagu gaadho shirka iyo sababta aad ugu baaqday in marka hore ba loo qabto shirka.

Shirarka ugu saamaynta hufan lehi, wa kuwa ay ka soo baxaan, waxyaabo la taaban karo, ama go'aano muhiim. Waxa kale oo muhiim ah, shirka mushkilad taagan lagu xalliyo ama ay ka soo baxaan war cad oo qoran oo soo koobaaya, waxyaabaha tannaasulaadka ah ee ka soo baxay shirka.

**Hannaanka:** Weli ma dhacday in aad ka soo baxdo shir oo aad qofka kugu xigay, ku tidhii "waa aan hubaa, shirkani, wuxu ahaa mid xun!." Inta badan faallooyinka duulduulka ah, ayaa lagu tuur-tuuraa habka shirka, ama natiijadda lagu gaadhanba ha noqotee. Waxa laga yaabaa in aan shirka si fiican la isugu soo dubba-ridin. Laga yaabaa, in la quudhsaday sharafta qaar ka tirsan ka-soo-qayb-galayaasha shirka. Waxa kale oo laga yaabaa in uu shirku ku dhammaaday waqhti ka badan intii loogu talloagalay.

Machadka ICA waxa uu kuu hayaa faallooyin xiiso leh oo xaga habka shirar la xiriirta, kuwaasi oo haga shirarka laguna daabacay qoraalkooda, kaga lib keenida ka wada qaybgalka.

**Fududayntu waa laba aflay, mar waa cilmi saynis, marna waa aqoon-fanneed – taasoo ku lug leh mihnad si quman logu carbismay oo leh dareen dadka qaata. Hagayaasha, fududeeya shaqadda, waxa ay tahlaan tababar laga sulgaadhay in ay yeeshaan xeeladaha iyo habka loo fuliyo nooca xirfadooda.**

Waxyaabaha habka shirarka loo qorsheeyo, waxa luxdoon:

- a) saadaal fiican oo xaqiiqo ku dhisan.
- b) In aad sii tibaaxdo masuuliyadda shaqaddu ku soconayso hannaanka iyo waayaabaha ka soo bixi doona shirka.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**



- c) Tixgelinta iyo kooxda maamuusida kooxda curinta leh iyo qofka ka mid ah kooxda leh waxsoo saarka curineed ee arrimaha shirka.
- d) In shirka lagu qotomiyo xaqiiqadda
- e) In aad noqoto qof dabacsan oo leh u dareen qabka qofka wax su'aala, iyadoo hawsha kooxda kale caadi ahaan dhanka ama tubta loogu tallogalay u socoto.
- f) In la dhiirigeliyo ka wada qaybgalka
- g) In lag fogaado naqdida, cadhada, iyo niyad jabinta si ay ugu suurto gasho ka qaybgalayaasha shirka in ay horumar ka gaadhaan shirarka.

Wax badan ayaa laga sheeki karaa arrimaha ku ladhi kara marka aad adigu. Shirguddoomiye tahay ama aad ka qaybgalayso shir uu qof kale guddoominayo. Waxa ka dan ummaddeed lagu soo qaadin, qaadaadhigo. Sida badan, waxa shirar lagu soo qaadaa waxa ina khuseeya, ama dad kale saameeya. Waxyaabihii uun bay wax ka tilmaamayeen. Si kasta ha u qorshe xumaadee, waxa hubaal ah, in shirarka loo hurayo wakhti iyo tammarr aadami, laga yaaba inaan la raacin tubtay mudnaayeen dantoodu.

Marka aad shirar badan qabatinto, waxa aad filayaa in aad maanka ku hayn doonto, “ninka aan wax ba dhiibini, waa ka naftiisa bixin waaya”

### **Ciyaaryahanka kooxeed**

Dadka qaar baa laga yaabaa in ay ku murmaan in aanay golaha la soo doortay isu qaadan, koox ciyaartooy ah, sababta oo ah waxa ay matalaan xil loo soo idmaday. Arrin ta ah in ay yihiin koox ciyaartoy ah, waxa ay la jaan-qaad tahay qoddobka aan ka hadalay ee ah in uu xil dhibaanka gole deegaan yahay xidhe-hawlfududeeye.

Buug dhawaan soo baxay oo soo koobay cilmi baaris lagu sameeyey arrinta bal – kooxeed ah, hawl-wadaag oo ay ka qaybgaleen 75 dal oo kala duwan, ayaa arrimaha koox wada shaqaysa inoo qeexaya; oo aan ka helaynaa in inoogu filan tusaale:

- € Kooxdu waxa ay ka koobnaan karta labo qof ama dad ka badan,
- € Waxa ay leeyihiin hawlo gaar ah oo ay qabtaan, ama hadaf la yaqaan oo ay doonayaan in ay gaadhaan.
- € Habsami isugu dube-ridka hawlaha dhexdooda, koox ahaan waxa ay u baahan tahay sida loo helo in la gaadho hadafka iyo ujeedooyinka shirka.

Qorayaasha cilmi baarista wada-shaqaynta kooxda oo la kala yiraahdo Mr. Carl Larson iyo Frank la Fasto, waxa ay tilmaameen qoddobada keeni kara wada-shaqan-tayo leh oo dhexmarta koox isku hawl ah.

1. Waa in uu jiraa hadaf cad oo la tiigsanayo
2. Qaab-dhismo u darban sida natiijooyin loo soo saarayo
3. In ay ku jiraan, ama ka kooban yihiin xubo firfircoon
4. In ay leedahay hawlgal uga qoran si midaysan na loo qabanayo. Ama hawlgal loo dhan yahay
5. In ay leeyihiin jawi wax wadaqabasho
6. Qiimeyntoodu in ay gasho heerka fiicnaanta ama tayaynta.
7. In ay tixgeliyo taageero ka haystaan dibadda iyo ummadda.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

## 8. Hogaamin mabda' leh.

Haddaba bal aan si aad ah qodob-qodob ugu eegno siddeeda ee aan wax ka soo sheegnay:

**Hadaf cad oo oo ku-hirasho leh:** Waa dareen hawl-gal, waa hummaagga fikradeed ee suga qaabka qaddiyadda ee keenta xilqaadnimadda falka lagu qabto. Waxa aan faaqidnay arrimaha ku saabsan sida hadafka iyo ujeedooyinka loo samaysto marka la eego kaalintaada haddii aad tahay qof siyaasad sargooya. Arrinta muhiimadeeda su'aal ka ma taagna.

Arrimahaasi waa muhiim, haddana, la ma maleyn karo “kooxda” wada-shaqaysa ee golaha haddii aanay jirin maamul xoogan oo deegaanka ka xilqaad ah, oo hawl-galkoodu aanu raaligelin bulshadda, sidoo kale waxa ay noqon arrin adag, sababta oo ah xildhibaan kasta waxa uu la imman karaa fikrad gaar ah oo uu la dhex yimaado golaha, iyo si gooni oo uu arko xalka mushkiladdaha horyaal golaha deegaanka. Mida kale, haddii aanu jirin yool la higsanayo oo dareen cad leh, suurtoagal ma aha in la dhiso koox guddi ah ee golaha oo tayo leh, si bartilmaameed loogu helo habsami uga faa'iidsiga. Khayreedka dalka, oo samayn horumarineed ku yeeshay mustaqbalka ummadda.

**Dhismo midho-dhalin leh:** Golaha Degaanku ma u habaysan yahay qaab dhaxal gal ah, oo lagu kasbado in natiijooyin wax-ku-ool ahi ka soo baxaan hawlhooda? Arrinkaasi, waxa laga eegaya labo dhinac, ta hore siday ayaa meelmar u yihiin waxqabadka goluhu? Dhinaca kale, sidee ayaa ay tahay tayadda qaab dhismeedka guddiyadda golaha deegaanku, haddii ay arrintaasi tahay habka socodsiinta hawlaha iyo ka go'aan gaadhida ku meelgaarka ee danaha bulshadda loogu adeegayo?

Guddiyadda kala duwan ee Golaha Degaanka, ma ka dhexaysa wada-shaqayn jooqta ahi si ay xogogaal isugu noqdaan? Ma jira xeer cayima amaradda abuura tayo xumadda shaqadda iyo wax qabadka golaha? Haddii ay sidaasi jirto isbahaysi la yeelo golgayaaha kale oo wax ka bedel xaaladdaasi?

Arrimaha keena qalqalooqa, waa hababka hadhaadiga ah ee laga dhaxlay maamulkii gumaysiga iyo diktaatoriyadda ku dhisanaa ee aan la dooran. Waxa jira fikradu diidan amarka iyo kala dambeynta sharciga maamul oo aan meel ka soo gelin u saldhiga hannaanka maamulka bulshadda casrigan. Qaab dhismeedka maamul iyo guddi waa inuu la jaan qaado shaqada ummadda loo qabanayo, balse aanu carqabad ku noqon hawsha, taasoo ah xaalad ku dhacda xukuumadda ama maamuladda.

**Xubnaha firfircoon:** Arrintaasi qofku xubin ahaan ku ma fila ma na xakameeyo hase yeeshe, firfircoonidu waa furaha lagu dhisi karo koox guddi guddiga oo waxtar leh. Qoddobka ugu mudan ee wax lagu toosin karaa waa kartida iyo firfircoonida xubnaha oo la kobciyo, iyadoo tababarku uu yahay tab ka mid arrimahaasi. Istaraatiijiyad kale waxa ay tahay in qof kasta loo jiheeyo meesha uu kartidiisa ku soo bandhigi lahaa, kaqaybgalka xalinta mushkiladda uu goluhu fulinayo. Qof baa markaasi khabiir ku soo bixi kara arrimaha dhinaca daryeelka adeega & caafimaadka, iyadoo uu xildhibaan kale uu waayo-arag ku noqon karo shaqooyinka hawlaha guud ee adeega bulshadda.

**X/dhibaan  
ka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

U qoondaynta xubin kasta ee xildhibaan shaqo gaar ah waxa ay abuuri kartaa is aaminaad heer sare ah oo golaha dhexdiisa ka hirgasha. Kartida qofka xildhibaanaka ah, waxa laga qiyaasi qaataa cod u bixinta cidda la xulanayo, marka uu jiro hab diimoqraadi ku meelmara. Waxa muhiim ah in aad fikrad wadaag la yeelato xildhibaanadda kale, taasoo la xiriirta aqoonta gaarka ah ee aad hawl u leedahay, iyo in aad ku taageerto tababarka dhammaan xubnaha golaha.

**Ballanqaad Midaysan:** Waxa carqabad ku noqon kara waxqabad fiican oo uu yeesho goluhu, iyadoo ay aaminsan yihiin aragtiyo kala duwan. In la helo hawlgal gole oo ballanqaad midaysan leh, waxa gaabis ka dhigi kara dad ka socda xisbiyo kala gedisan, oo aragtidooda siyaasadeed kala duwan tahay, iyadoo gole kaliya ka wada hawlgala. Hase yeeshee, kala aragti duwanaantu, mar baa ay xoojin kartaa shaqada golaha. Waa la kala fikrado duwanaan karaa xaga siyaasada, waana loo wada shaqayn karaa xoojinta horumarka danaha bulshadda.

Arrinta ugu weyn ee keeni karta fududaynta wada shaqayn midaysan oo goluhu yeeshu waa in la ismaqlo si xaqiiqadda ku dhisan, iyadoo wax kasta si quman looga baraan dagayo.

**Nidar-gal mideysan:** Ururka magaalooyinka ee dalka Maraykanka saadaal ay dhawr sanno ka hor qaadeen waxa lagu caddeeyey in mushkiladda laad ee golaha deegaanka ay tahay isfahamka xubnaha uu ka kooban yahay goluhu.

Arrinta kaliya ee ugu muhiimsan ee xooginta wada shaqaynta waxa saldhig u ah is aaminaada. Si is aaminaad loo helo guddiyadu ay yeesheen, waxa muhiim ah in la helo caddaalad ku dhaqan, isku fur-furnaan, xog kala qaadasho, iyo is ixtiraam dhexdeooda ka dhalata.

**Jawi iskaashi:** Waxa dadnimada qiimogal ka dhiga sida loo arko wada shaqaynta guddiyadda golaha go'aan qaadashadda iyo sida ay uga soo dhalaalan xilka loo idmay. Waxa kale oo muhiim u ah wada shaqayn fiican oo ay la yeeshaan qaybaha bulshadda iyo ururadda waddaniga saraakiisha ka socda ee aan ahayn kuwa ay isku hayadda yihiin. Waxa laga yaabaa, haddii aad tahay hawlfududeeye in ay kuu muuqdaan qoddobo isqiimayneed oo uu waxqabadkiisa ku jaangooyo, inuu goluhu u baahan karo inuu yeesho ama heer-qiyaas u samaysto.

**Heer is-qiimayneed:** Golaha Degaanka, wuxu yahay madaxa hawlaha hay'adaha kale ee guud ama gaarka ah.

### **Aqoonsi iyo taageero dibadeed:**

Aqoonsiga ugu sarreeya ee heer-beegga arrinta lagu saleeyaa waxa kow ka ah inuu goluhu kasbado wax qabad fursad u siiya in dib loo soo doorto; Iyadoo taageerada u hayso laga eegayo waa in dib isu qiimeyn goluhu kulan kast ku sameeyo xaga sumcada bulshadda.

Si kasta ba ha ahaatee, wada hadal joogta ah oo bulshadda lala yeeshaa ma aha sida qudha ama kaliya ee lagu xaqiijin karo in xiriir xoogan iyo taageero aqoonsi ay u bulshaddu si joogto ah ugu hayso golaha.

**Hoggaamin mabda' ku dhisan:** Kooxuhu waxay u baahan yihiin Hoggaan. Arrintani waxay u muuqataa hadal aan taxnayn? Miyaanay sidaas ahayn? Hase yeeshee, waxaan ogaaday in hoggaan ku filan hawlaha, aanu ahayn Duqa oo kaledii ah ama guddoomiye guddi, in kasta oo ay jagooyinkaasi muhimadooda

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

leeyihiin. Xiriir ka shaqo waa kuwo isku wada xiran, madaxduna waxa ay u baahan yihiin taageeradda bulshadda. Haddii ay bulshaddu kaa aamin baxdo, waa ay adag tahay sida aad ugu noqonayso hogaamiye. Marka ay timaado xaga wada shaqaynta guddiyadda golaha, waxa muhiim ah inuu qof kasta noqdo hogaamiye.

### **Tani ma aha waxa ay doonayaan doortayaashaydu**

Weli ma ku soo martay in aad u babac-dhigto xaaladdan oo kale? Goluhu isagoo si fiican isugu duuban, waxa soo baxay barnaamij u qorshaysan sida ugu wacan ee danta mujtamacu ku jirto, hase yeeshee dadka adiga ku soo doortay ee magaaladaada arrin sidaasi u ma karkaan. Waxa ay u arkaan in aad codkaaga siin doonto ku ansixinta codkaa tirada badan ee taabacsan arrintaasi, iyagoo oo aan taasi ku faraxsanayn. Maxaad yeeli layd?

Ugu horran, waxaad difaaci lahayd go'aankaaga haddii uu ku salaysan yahay xog wanaagsan iyo gorfayn dhinacyo kala duwan leh oo ay ka mid yihiin sababta aad ugu garatay in u sidaasi ku habboon yahay in la yeelo.

Ta labaadna, waxaad u baahan kartaa wakiilo matala dadka ku soo doorta si aad ugala dodo hindisahan iyo sobobta uu u yahay mid dani ugu jirto beesha ballaadhan iyo sida ay iyaga laftooda waxtar ugu leedahay baahiyahooda.

Ma jirnaa go'aano daraasad oo lagu dhammayn karo xiisadaha noocan oo kale ah. Go'aankaagu waxa uu xoog yeelan karaa haddii adigu (a) si furan aad uga hadasho sobobta aad mowqifkaa u qaadatay, (b) in aad sidaasi u yeeshay adigo aaminsan in tani tahay ta ugu wanaagsan ee danta Dawladda Hoose (taasi ma jabinayso go'aanada ay raacsan yihiin dadka ku doortay laftoodu), iyo (c) in aad diyaar u tahay in aad raacsantahay ku shaqaynta in la dhaqan geliyo go'aammada ugu dambeeya ee Golaha Degaanka, xataa haddii aanay taasi waafaqsanayn habka aad codka u bixisay.

### **Jawaabtu ma koox samayn baa?**

Mararka qarkood waxa dhacda in uu goluhu ku mashquulo dhismo guddiyo oo ay muddo qaadato, sida saddex maalmood. Waxa uu goluhu kaga gudbi karaa marka goluhu ka baxo wax kale oo u dib ugu noqdo jaangoynta laba arrimood oo waaweyn: (a) sideebaa innaga oo wada jirna aan ugu shaqayn karnaa koox ahaan? (b) waa maxay arrimaha ugu waaweyn iyo fursadaha aan inagu ugu baahannahay in aan ku koobnaano kaalinta hoggaamineed ee danaha beesha? Marka golaha ay ku qaadato wakhti lagu fuliyo duddi dhis wax ay sida badan la shaqeeyaan fududeeye debeda laga keeno, sida qof ka socda hay'ad tababar bixisa ama mid qaabilsan arrimaha maareynta la talinta taasoo xirfad u leh in wax qabad ku soo dhex galo arrintan oo kale. (kooxo dhisku waxa kale ee uu ku lug yeelan karaa tababar xirfadeed, adeegsiga agabka buugani uu sido)

Qaab kale oo la xidhiidha koox dhisku, waxay tahay in la gaadhsiiyo doodaha noocyadan ah ee dhex mara xubnaha golaha deegaanka iyo shaqaalaha kale ee maamulka ah ee muhiimka ah. Is dhexgalka golaha iyo shaqaalaha gaar ahaan waxay faa'iido leeyihiin marka ay jiraan mushkilado ka dhex samaysmay golaha iyo shaqaalaha oo la doonayo in la taabto halka dhibtu taallo si ayugu xalliyaan shaqo maalmeedkooda ee uguna fudud. Waxa kale oo ay doodaha is dhexgalka ay faa'iido leeyihiin marka goluhu ku dhex jiro hawlaha qorsha fog iyo wax

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

gelinta wax qabadka shaqaalaha xirfad laha ah oo ay muuhiim u tahay sidii xaaladda loogu addeegsan lahaa.

Kooxo dhisku waa istaraatajiyad gacan ku siisa shaqadaha golahaaga ilaa kartida ugu sarraysa iyo wak ku oolnimada – fursad lagu qabto hawl socodsiin yar oo tijaabo baadhitaan u ah shaqada golaha iyo in ay taasi laftaada kuu noqoto mid xilli “aad la soo baxdo”. Waxa kale oo ay u tahay istaraatajiyad bilowga geedi socodka miisaaniyad samaynta sannadle mara aad u baahato in aad ugu koobnaato arrimaha ugu mudan ee u mudan danta bulshada ee mustaqbalka la xidhiidha iyo sidii ay Dawladda Hoose ay waxtar ugu kordhin lahayd in arrimahaasi mustaqbalka gacan ku hayn fiican loo yeesho.

In aad xubin ka noqoto koox wax ku ool ah waxay u baahan tahay xirfad mug ballaadhan leh iyo dabeecad. Waxa kale ee ay u baahan tahay karti lagaga shaqeeyo xidhiidhada isku qasan dhexdooda ee qayrkaa. Dhinaca kalena waxay tahay mid aan surto gal ahayn in gole maamul adiga iyo saaxiibadaaba hadaydaan lahayn wada shaqayn koox ahaaneed aanu markaasi goluhu waxqabad waxtar leh yeelanayn. Dhinaca kalena kalidaa ma noqon karti wax ku ool ka wakiil la soo doortay ahaan, haddii aanad diyaar u ahayn oo aanad awoodin in aad is taagto kaligaa.

### **Milicsi**

Waxa aan soo bandhignay aaraa aanad hore ula socon oo ku saabsan kaalin laga yaabo aanad hore aqoon ugu lahayn adiga iyo dad kaleba – taasoo ah hawl-fududeeye. Waxa aan jeclaan lahaan in aad wakhti kooban fikiradaha kooxda aad ugu muujin lahayd in goluhu waxqabadkiisa u adeegso. Fikradaasi micne muhiim ah, ma kuu samaynaysaa? Haddii ay haa tahay waayo?, Haddii ay maya ku la tahay sheeg sababata? Sidee ayaad wax ku ool dheeri ah ugu kordhin lahayd shaqada adiga oo koox xubin ka ah?

Haddii aad shay ku kordhin karo si aad kor ugu qaado wax ku oolnimada shaqada golaha, maxaa ay taasi noqonaysaa?

<hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/>
-------------------------------------------------------------

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

### **Maaraynta xiisadaha**

Nin baa beri laga hayaa in uu yidhi, in lagu xagto sidaad iskaga ilaalin lahayd waxay ay dhab ahaan tahay adiga oo aan tegin meesha lagugu xaganayo.

Xiisaduhu, waxay ka mid yihiin arrimaha aan ka dheeraano, haddii aan taasi karayno. si kasta ha ahaatee, haddaba xiisadaha iyo waxyaabaha keena agteena kama fogaadaan waxa ay ku xeeran yihiin hareeraheena. Ka muquurashadda khilaafka oo la xaliyaa waxay abuuri kartaa mushkilado badan oo ku yimaada hay'addo badan dhexdooda. Waxa aan ognahay in dhaqan kastaa uu leeyahay habka loo raaco xalinta khilaafaadka oo u gaar ah. Waxa kale oo aan ognahay in dhaqamada kala duwani ay leeyihiin siyaabo kala duwan oo loo dhammeeyo xiisadaha waxa kale oo aan odhan karnaa waxaynu sheegayno waxa shaandheeya oo la soo dhex mariyaa habka maareynta arragtida saykoolojiyadeed iyo adeegsi ee reer galbeedka. Arrinta ugu wanaagsani waxay tahay in aan daacad ahaano oo aan is weydiino in qof kastaa biimeeyo fikradahaasi uuna garto in habsami u adeegsigoodu ku salaysan yahay waayo arragnimadeena iyo waxyaabaha lama taabtaan ee dhaqankeena. Dadku, waxa ay uga baqaan khilaafka in uu abuurmo, waayo, waxa ku jirta karaahi ah in uu dibeda u soo baxo. Dhinaca kale qarinta khilaafku waa dhib kale. Khilaaf ururay oo dhitaysmay muddo dheer waxa uu abuuri karaa qarrax ka dhaca hay'ada si uu xildhibaanku u noqdo Hage/oday, ama hawlfududeeye, waxa hubaal ah inuu u baahan yahay inuu yeesho aqoon iyo xirfad lagu maaryen karo mushkiladdaha iyo khilaafka.

Inta badan, guud ahaan, waxa aan xogogaal u nahay qaababka tabban ee khilaafka ama dhibaataadda dad isku kacsan, balse ma ogin waxtarka khilafka bulsho isku kacsan. Arrinta ugu darran ama xumi, waxa ay tahay in ay, mushkiladaasi u soo baxdo bannaanka.

Waxa dhici karta, in aan ka fogaano khilaafka, sobobtuna, waxa ay noqon karta in aynaan tahli Karin xalkeeda. Mararka qaarkood, waxa jirta, in aan isku keeno dadka khilaafku dhexyaalo, oo aan farsad u siino in ay qaylo iyo is xagxagasho iyo duulduul haddal kaleba sameeyaan, balse, aynaan ku guulaysan in aan bogtadda daaweyno dhinaac tagan, ee uu ku soo kordhin karo xiriirka hufan ee marka laga eego qofafka uu dhexyaalo, koox kooxda, ama ururuadda, ama ummaddaha.

Fiiri, shaxda, dhinacyada kale duwan ee khilaafka arrimaha abuura. Dhinaca toosan ee khilaafku, waxa uu keena in uu innagu khilaafku in aan xal cusub u helo khilaafka. Khilaafku, waxa uu noqon karaa jidka lagaga gudbo carbad muddo kugu hor kardadnayd.

Dulmar deg deg ah, tani waa shaxda dhanka tagan iyo kan taban ee xiisadaha. Dhinaca taban ee xiisaddu wuxu abuuri karaa wel-wel, walaac iyo shaki badan, wuxu ku ridi karaa qanac iyo gaabis. Xiisaduhu waxay kala diraan dad wadajir ku yeelan lahaa wax-soo- saar ummaddeed oo tayeysan.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

#### **Ogaanshaha sababta xiisadda:**

Xiisaduhu waxay abuurmi karaan marka lagu kala duwan yahay:

- € Xaqiiqada iyo sida aynu runta u sawiranno,
- € Ahdaafta iyo natiijooyinka la door-bido (Sida ay tahay in ay wax noqdaan, ma aha sida ay immika yihiin),
- € Habka iyo qaabaka lagu gaadhayo ahdaaftaa,
- € Qiyamka (Arrimaha assaasiga ah ee aynu aaminsan nahay),

Khilaafka ka dhaca, sida kala duwan ee micneeyo xaqiiqada ayaa ugu dhib yar in xal loo helo. Waxa ka adag xal u helida khilaafka ujeedada iyo hadafka, waxyaaba naatiijada ee arrin ka soo baxday.

Kuwa xaga qiimeynta lagu kal gedisan yahay xalkoodu ayaa ugu daran ama raad adag yahay.

### **Istaraatiijiyadaha xiisadaha**

Dadyowga kala duwan oo dhaqankoodu kala geddisan yahay ayaa siyaabo kala duwan u maareeya xiisadaha. Waqti laga joogo sannadoo badan ee xilliyadii la soo dhaafay ninka la yidhaaho Mr. Kenneth Thomas o ah mid ka mid ah khabiirada ku xeeldheer khilaafka ayaa waxa uu ogaaday shan arrimood oo xuddun u ah istaraatiijiyada xalinta mashaakilka. Shantaasi qoddob oo ay u adeegsan karaan shakhsiyaad ama koox xalinta mashaakilaha soo waajiha. Qaababkaasi waxay ku salaysanyihiin laba dhinac oo ah aasaas dabeecadeedka mishaakiladu ku fadhiyaan, “Damac-qancin (Ila iyo inta nafteena raalli-gelin karta ee damaceena qancin karta) iyo “Garaabis” (ila iyo inta aad uga garaabeyso qof kale raalli-gelinta damaciisa khusaynta qof kale).

Isaga oo la adeegsanayo naqshadda laba-geesood laha ah (eeg bogga soo socda) ee cabbirka fikirka ku jaango’an qiimeynta kor/hoos ee labada dabeecadood ee aan soo sheegayney, waxa uu qeexay shanta nidaam ee gaarka ee lagula tacaalayo khilaafyada.

**Ka-fogaansho:** (Is-caddayn iyo iskaashi la’aan). Shakhsiyaadka ku dhaqma dariiqada ka war-wareegga is-khilaafka ma eegaan dantooda ama wax khuseeya iyaga iyo kuwa ka soo hor jeeda ee lidka ku ah. Dadkaasi waxa keliya ee ay uga fogaadaan is-khilaafka ee xeeladahaasi ay u sameeyaan iyaga oo u jeeda in aanay, shirka mushkiladaha lagu gorfeynayo is-keenin, ama wax ay ula jeedaan iney amuurta dib ay ugu riixaan ilaa xilli aan caynayn ee wakhtiyada dambe ah.

**Oggolaansho:** (Is-caddayn la’aan iskaashi leh). Dadka iyagu raaca hannaankan waxay liidaan dantoodii iyo wixii khuseeyey si ay u raaligeliyaan danta iyo kusheynta dadka kale. Xeeladaha ay isticmaalaan waxa ka mid ah dariiqaddo isburinaya oo ay ka mid yihiin: u habrasho fikirka dhinaca ay is-hayaan iyo u muujin naxariis xad dhaaf ah.

**Tartan:** (Is-caddayn aan iskaashi lahayn). Habkani wuxu lid ku yahay oo uu ka soo hor jeedaa habkii ka horeeyey ee habrashada. Haddaba, habkani waxa uu ku qotommaa hilin istaraatiijiyadeed taasoo lagu sargooyey in qiimo kasta ha ku kacdee ay qofka guushu isaga raacdo. Markay timaaddo iska-caabbinta xiisadeed.

**Wada-shaqayn:** (Is-caddayn iskaashi leh). Waxay ku lid tahay marka si loo fiiriyo habkii hore ee ku dhisnaa ka war-wareegidda iyada oo qofka xaaladdan raaca uu ugu muujineyo wada-shaqeynta sideeda ugu fiican waxana uu raadiyaa inay gartu labada dhinacba ay ku wada qosliso oy wada guuleystaan laba geesood ee is-haya. Habkan waxa ka mid ah in xalka noqdo mid raaligeliya baahiyaha iyo khusaynta labadan dhinacba. Waxa kaloo istaraatiijiyadan ka mid ah in la garto waxa sababay mishkilada jiritaankeeda waxaana la raadiyaa xal dhibta meesha ka saara, amaba in la hello hab lagu yareynayo ama hoos loogu dhigayo sababaha khilaafaadka iyo in sidoo kale la yareeyo damac u tartan ee khayraadka.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

**Xal-dhexe:** (Wax is-caddayn iyo iskaashiba leh). Dhinacyada habkan adeegsadaa waxay raacaan tabo ku dhisan in gorgortan meel-dhexe ah la isugu yimaaddo marka ay doonayaan inay arrintu degdeg ku dhammaato, taasi oo ah in dhinac kastaa si quman u aqbalo xallka dhinac walba qayb ahaan u raalli-geliya.

Istraatejiyada waxa ka mid ah in la hello meel dhexe la isugu yimaaddo oo uu mid walba ku aqbalayo wada noolaanshaha kaas oo burburinayo wixii I-smaandhaaf ahaa ee laba dhinac dhex yaallay.

**Qaab xiisadeed oo laba-geesole ah**

**Iskaashi**

Kor/kor	Damac-u-tartan	Gar-maslaxo
	Xall-dhexe	
Damac-qancin	Ka fogaansho	Gacansiin
Hoos/hoos		
Hoos/k		

Sida uu tibaaxay Mr. Thomas ma jiraan “jawaabo sax ah” oo guud marka ay timaado la tacaalida khilaafka. Dhammaan shanta haybood ee dabeecadaha iskhilaafka uu ku ifiyey waa muhiim. Xaalad taagan ayaa saamayn ku leh oo ay xidhan yihiin. Waxa la rumeysan yahay in qof kasta oo inaga mid ihi oo ku wajiban maareynta xiisaddu. Tusaale ahaan “in qaarkeena ayaa laga yaabaa inay leeyihiin xeelada ka fogaansha is-afgaranwaaga ama xiisadaha, qiimo kastaba ha kukacdee, halka ay kuwo kalena leeyihiin dabeecad gar-ma-qaatonimo ah, ama dareen damaacinimo, marka ay himaadaan xaaladaha khilaafku, ka bacdina waxa mar kale la arkaa in aan aqbalo in xal meel dhexe ah garbixi ku noqono, ama mid kale oo la xiriirta hababka moodeedl ee Mr. Thomas aan waafaqno.

**Sahaminta kala-taggaanshaha:**

Haddii aad doonayso in aad gacan ka geysato sida loo maareyn karo xiisadaha, halka ugu wanaagsan ee aad ka bilaabi lahayd waxa ay tahay in aad fahamto arrimaha xiisadda abuuray ee ka dambeeya. Taasi wax ay macnaheedu tahay in aad gaadho salka shishe ee hoos ka sii xigga ishaarooyinka soke ama tilmaamaha dusha dhow ka muuqda ee hurinaya khilaafka.

Xaqiiqadu ama wixii run ku salaysan waa waxa ugu sahlan ee go’aan cad laga bixin karo, ama dib la iskaga afgarran karo. Fikradaha maan ka cabbirka ah ama mallo-awaalada ayaa aan la isla fahmin oo ugu adag in la isku waafaqo. Sida la garran karo, fikradaha noocan ah waxa ay ugu nugul yihiin dhalandoorsoon, qaab ahaan waayo waxa qumanaha qoorta inoo sudhan u damac ah inaan mooshin ama hadafyo kale u aanayno ficilada dadka kale, waxaana in xaqiiqada halka aanu arrinta ka taaganahay ay ku caddaan doonto. Tusaale ahaan waxa laga yaabaa in aad u malayso aragayga maan-sawir ee xaaladu ay tahay khiyaal aan badhax lahayn balse aniga waxa aytaydu ii suureysan tahay wax xaqiiqo ah. Haddaba sawirka maan-ifineed ee caqligayga, tusay ee ku saabsan waxa u xaqiiqada jiritaankeeda ayaa ah qeyb ka tirsan aaga tixraac ee aan xaqiiqadeeda ku saleeyo iyo habka aan ula tacaalayo khilaafaadka. Mararka qaarkood waxa si fudud loo ifiyaa arrimo malo-awaal ah oon sax ahayn “iyadoo fikirka noocaasa laga soo

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**



la soo doorto abuurro xaqiiqooyinka”. Wakhtiyo kale xaaladu way ka sii adakaan kartaa. Waxa haatan aan kuu muujin doonaa ficillo aad sameyn karto si ay kaaga caawiyaan go’aan ka gaadhista xisado dhex yaal laba qof ama kooxo.

Waxaanu halkan kugu soo gudbinaynaa qodobbo aad u adeegsan karto fududaynta maareynta xiisado dhex mari kara laba qof ama kooxaba:

1. Ku gargaar qofafka ama kooxahaba in ay xiisadda iska taagaan dhinaca ama docda qofka kale. Halkan waxa kaaga muuqanaysa xaalad xirfadaha “dhegeysiga nugul” loo adeegsan karo (Eeg Tilmaame-baraha Xildhibaanaka Degaanku markuu yahay Is-gaadhsiiyaha si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida loo wada xidhiidho),
2. Raadi meelaha, mid kastaa uu ka keenay cabsida uu ka qabo dhanka ay is-hayaan,
3. Kala fogee dadka is-haya si aan dagaal ama af-lagaaddo u dhex marin. Inta badan xiisadaha waxaynu ka filannaa waxyaabaha ugu xun xun, taasi na waxay ina dhaxalsiisaa is-difaac, weerar iyo rogaal-celin iyo xaaalado qallafsan,
4. Ku gargaar in ay danahooda ka soocaan ama ka saaraan mowqifkooda. Waxaynu u badan nahay in aynu ku dabranaanno meel ama “mowqif” (Tusaale, waan fahmayaa mowqifkaaga ku wajahan waddada wareegga ah, laakiin waa maxay waxa aad doonayso in aad heshaa?) Mararka qaarkood qiimaynta danaha labada dhinac ayaa kugu hoggaamisa helitaanka xal lagu wada qanacsan yahay.
5. Ku gargaar labada dhinacba in ay la yimaaddaan waxyaabo door ah oo la kala xusho. Inta badan waxa keliya ee la kala doortaa waa labada ra’yi ee ay soo kala jeediyeen ee lagu muransan yahay.
6. Ku dhiirri-geli in ay is-dejiyaan, shaydaanka iska naaraan oo aanay dareemmadoodu dabarka goosan. Mararka qaarkood dareemmada ayaa ka xoog weyn xaqiiqada. Marka ay dibadda u baxaan, waxay fursad u helaan in ay is-faaruiyaan oo cadho-burburaan, taasina waxay dawo u tahay xanaaqii ay doodaha ka qaadeen. Inta badan cadho-burburku wuxu keenaa in ay kugu soo maaxdaan warar iyo macluumaad aanad hore u haynini, kuwaas oo aanad si kale ku heli karin.
7. Ku gargaar in ay labada dhinacba guulaystaan ama muranka dhex yaal midba wax ka dheefo. In kasta oo aanay Gari laba ruux ka wada qoslin, haddana waxa fiican in qodobbada lagu muransan yahay midba wax ka dheefo. Kii halkan wax ka waayaa meel kale ha ka helo. Qof ama dhinac waliba kuma guulaysto gar ama xiisad laga gar-naqay; waxa se la yaab leh inta jeer ee xiisad laga gar-naqay labada dhinacba in ay guulaysteen dareemi karaan. Waa halkan halka ay ku jirto kartidaada dhegaysigu si aad laba dhinac oo is-haya ugu gargaarto in xiisaddooda maaro u helaan. Awoodahaaga ugu fiican ee aad laba dhinac oo is-haya ama xiisadi dhex taallo ugu gargaari kartaa waa:
  - a) Agabka caydhiin ama wararka ugu horreeya ee ay madasha la yimaaddaan (dareen iyo aqoonba),
  - b) Dulqaadka aad u yeelato in aad labada dhinac ee is-haya ku gargaarto in ay sii hufaan wararka caydhiin ama bilowga ah ee ay madasha la yimaaddeen si loo gaadho heshiis lagu wada qanacsan yahay.ga baaraandago, si aqoonta iyo dareenka caadifadeed u keenaan heshiis waara.

**X/dhibaanaka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Haddii aan ku celino xiisaddu waa khayraad qiimo dihin u leh inta badan hay'adaha ama ururada. Waxaa rajeynaynaa in aad u gashan doontid koofiyadaada xil fududeeye iyo in aad ku kaalmayso maareynta xaaladahan oo kale inta aad waddo xilka iyo mas'uuliyadaha xubinnimo ee golaha deegaanka iyo kaalintaada hogaamiye beel ahaaneed.

Haddii aanay duntu adkayn tolmuhu wuu furfurtaa.

Maahmaah Talyaaniya

### **Maaraynta mushkiladdaha:**

Istraatijiyada fududeynta ee ugu dambeysa ee aan dooneyno ineynu ka hadalno waa maareynta mushkiladaha. Ka xildhibaan ahaan, waxa aad ka caawin kartaa dadka ku soo doortay fududeynta siyaabaha kala duwan ee ay u furdaamin karaan mashaakilkooda. Mararka qaarkood waxa aad dhammeyn kartaa khilaaf xal u baahan adiga oo keliyaa matalaya golhii deegaanka oo dhan. Inta badan, waxa aad ku dhexjirtaa xalinta mashaakil aad u furdaamiso si aan rasmi ahayn, ama siyaabo ka sii caadisanba loogu hawlgalo. Kolkol, ayaa, waxa dhici karta in aad u baahato in aad la shaqayso shaqaalaha dawladda hoose, adiga oo u sii marayaa madaxa guud ee shaqaalahaasi, si ay kuuug meelmarto, in arrimo la fuliyo. Marar kale, ayaa waxa jiri karta in aad wado hawlaha ka lib keenida khayraadka bulsho daryeeliisa horumarineed, ama caadi ahaan helida wararka xilliyeed ee kulug leh halka aad ka raadinayso sidii aad kaalmo u heli lahayd.

Mar haddii aynu, ku soo wada sheegnay, intooda badan qoddobeeda muhiimka ah ee mushkilad – furdaaminta oo aan ku soo qaadanay buug facmeedka, cunwaankiisu yahay Xildhibaan ka oo ka dhigan hogaamiye go'aano. Gaadhis awooda, waxaynu kaliye si gar ah ifineed ku samayn doonaa tallaabooyin riiqda-culus leh ee wakhtigan.

1. Isku day in aad fahamto mushkiladda, inta aanad isku hawlin xalka mushkiladda.
2. Ka fiiri khilaafka dhinacyo kala duwan.
3. Isku daydo in aad fahamto, waxyaabaha ku dhalan kara khilaafka kaliya ooqudha ama qofka xaloonka ah, balse fahan saamaynta uu ku yeelan karo dhinaca kale.
4. U kala sooc mushkiladda qurub qurub, haddii ay suurto gel tahay. Sidaasi, ayaa sida caadiga u fudud in aad ku dhamayso khilaafka.
5. Isku day in aad raadiso cidda kale, ee ay haysato mushkiladaasi.
6. Mar alaale iyo marka aad ogaato waxa ay tahay mushkiladdu, ka fikir, haddii aad heli karto, qof kale oo danaynaya xalinta mushkiladaasi.
7. Eeg carqabada hortaagan in xal loo dayo mushkiladda.
8. Sidee, ayaa loo xalin karaa, iyadoo aan la adeegsan hantida ama kharashka dawladda hoose? Taasi, waxa ay tahay muhiim, wakhtiga marka kharash yaridu jirto ayna mushkiladuhu soo bataan.
9. Sidee ayaan ku ogaan karnaa marka mushkiladdu ay soo afjarantay ama dhammatay. Ka xil dhibaan ahaan waa in aad dabagal ku samaysaa wixii tallaabooyin ah ee meelmaray kuwo aan hirgelin si aad u hubiso in mushkiladaasi loo maaro helay.

**X/dhibaan ka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

10. Qoddobadda aan soo xushay waxa ugu weyn xubinta ugu horaysa “ si sax ah, miyaa aad u ilaalaysey mushkiladda nooceeda? Ogow in u xogogaal noqoshadan mushkiladdu la mid tahay in aad qayb ahaan xalkeedii aad gaadhay.

### **Tilmaamo gebogebayn ah:**

Sida aynu kaga ra’ir-bixinay ee xagal-celinta ee dhammaan arrimaha aan ka sheegnay ee ku saabsan kaalinta fududeeyaha, waxa aan xaqiiqsanay in aan sida ku haboon u dhammaystiray fikrado badan oo ku aadan inay u taagan yihiin, “Koofiyada-odaynimo” bulsho hage. Waxa aan tuhunsannahay in xirfado badan iyo istaraatiijiyado badan, aan ka hadlay in ay noqdaan kuwo ka dhigan dhalan-dabaceed labaad ee ku wajahan hogaamiyaasha bulshadda, iyo waliba in ay tahli in ay dhab ahaan isdabajoogo celiyo.

Waxa kale oo fikirkeena xagal-celineed ina xusuusinayaa, in ay jiraan wax badan oo dhimman, oo aynaan ka sheegin arrimaha kaalinta hawl-fududeeye ku lug leh. Aqoonta iyo xirfadaha la xiriira habsami u fulinta shirarka (ama samayn muuqata ugu yeelan lahayd ka qaybgalkaaga xubin ahaaneed shirka), la shaqayntaad ka xubin ahaan koox sharci dejineed, maaraynta mushkiladaha, iyo ka gacan siinta dadka kale ee xal u helida khilaafka, gabigood ma laha meel lagaga hadho oo ay ku dhammaadaan. Waxa dhici karta in ay koofiyado kale oo aad xidhataa, ay shaki la’aan aad uga muhiimsan yihiin. Tani, hubaal ahaan, waa ta ugu muujin ah, marka ay joogto “Gasho oo jarjar”. Waxa aan u malaynaynaa, in ay noqoto mid faa’iido weyn ku tarta, hadda aad in yar oo wakhti ah ka bixiso.

**Hoggaamiyayaal tiro yar ayaa rumaysan sida wax yari wax badan u taraan ama u gooyaanba.**

Lama-yaqaan

### **Qodobbo muhiim ah:**

- € Kaalinta Fududeeyaha Gole Degaan, waxay xanbaarsan tahay xirfado badan oo la barto iyo fursado la adeegsado;
- € Arrimaha ugu waaweyn ee looga fadhiyo kaalinta Fududeeye inuu xilkiisa ka soo baxo waxa ka mid ah habsami u maamulida shirarka dhismaha guddiyada iyo maareynta xiisadaha;
- € Shirarku waxay Xildhibaanaka Degaanka ku noqon karaan dhibaato hase yeeshee waxa gacan siin kuu noqon kara marka aad koofiyada fududeeyaha xidhatid.
- € Muhiimad in la siiyo iskaashi wada shaqayneed ee golaha guud iyo guddi hoosaadyadda
- € Qaar ayaa iswaydiiya in uu golaha degaanku iska dhigo koox ama wadar, iyada oo la ogyahay in ay golayaasha degaanadu leeyihiin astaamo kooxeed shaqadooduna aanay wax ku oolnimo ah yeelanayn wada shaqayn la’aan.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

- € Wadiiqooyinka mashaakilka lagu xaliyo badankii waxay iskugu jiraan ismuujin iyo iskaashi.
- € Khilaafku wejiyo dhibaato ha lahaadee, waxa uu leeyahay muhiimadeeda oo ku xiray sida ay ugu dareen bixiyaan goluhu, iyo curinta shaqo ee ka dhalata xubnaha golaha ee loo idmaday xilka qarran.
- € Mashaakilka bulsho waa badan yihiin, laakiin, waxa ugu daran, ta lagu kala fog yahay qiyamka assaasiga ah ee dadku rumaysanyihiin. Faasilitaytarku, waxa ay wadi karaan shaqo fiican oo keenta xaalad xal loogu helo mashaakilka.
- € Shaqada ugu fiican ee xalinta mushkilada waa ka salgaarida eesha mushkiladda fududeeyaha fiicani ma dayaco fursadaha lagu abyi kara maareynta mashaakilka horyaala.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

## **Raad-raac**

1. Spencer, Laura, kaga midho-dhalinta ka qaybgalka (Dubuque, Iowa, Kendall Hunt, 1989) bogga 81-89.
2. Ibid, boga. 88
3. Larson, Carle, iyo la fasto firnka M.J, shaqo-kooxeed (Newbury park, CA, 1989), bogga 19
4. Ibid, bogga 26
5. Ururka caasimadaha qarran, barnaamijka xalinta khilaafka bulshadda, caddadka I, “Kiis-koobyadda” (Washington D.C, urur weynaha, 1988)
6. Thomas, Kenneth, “Khilaafka iyo maareynta khilaafka” Buug-gacmeedka habka saykoolajiyadeeda ee hayadaha iyo warshadaha, caddadka II, (Chicago, II, Rand Mc Nally

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

**Qaybta 2aad**

**Aqoon-is-weydaarsi**

**Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu  
yahay Fududeeyaha**

### Ujeeddo

Fududeeyuhu waa kaalin si badan ku lug leh, xidhiidh la samaynta hawl tababarayaal iyo la taliyaal, si ay ugu sameeyaan u fududeyn macaamishood in ay shaqadooda ka midho-dhaliyaan.

Marka aan ka soo qaadno kaalinta hawl fudueeye, xubnaha golaha deegaanku waxa kale oo ay qabanayaan dadaal leh, oo kor loogu qaadayo la ogyahay qaabka uu goluhu ku wado inuu kaga gudbo dhibta iyo hawlaha culus ee maamulka.

Aqoom-is-weydaarsigan, waxa loogu talloagalay, inuu ka caawiyo xildhibaanadda deegaanka in ay noqdaan cudud saamayn togan u leh, ka fikirka iyo ku shaqaynta awood lagu hirdamo ka jibo keenida xilka hogaaminta la soo doortay. Ka qaybgalayaasha aqoon-is-weydaarsigani waxa ay ka barran doonaan sida loo awoodi karo wax ku biiran aad u micno leh oo loo yeesho shaqadda golahaooda, ayna ka mid yihiin ku fukinta shirarka, xalinta khilaafaadka iyo soo afjarida mushkiladaha.

### Tusmada:

Sharax kooban oo laga bixinayo dhaqdhaaq hawleed oo kasta, ayaa hoos lagu tusay, iyadoo la jaangooyey lagu fulin karo. Haddaba, haddii aad rabto inaad bedesho, sida la isugu xigxigsiyey taxanaha, ama aad wax ka saarto, ama aad ku kordhinayso waxyaabo kale oo tababarka ku saabsan, taasi, adiga ayaa u dareen bannaan oo u xor ah ee ku dhaqaaqoo qabo.

#### 5.1 Layli diyaar-garow: Maxaynu ku samaynaa sibidhka?

Isbarbardhiga waxay tahay natiijadda qofkasta, oo la ag dhigo, tan guddiga kooxda shirka iyadoo la soo abyayo curinta fikrado meelmar ah oo fursadda dooda aqoon-is-weydaarsiga looga faa'iidayso. (30 daqiiqo)

#### 5.2 Qoraalka Tababaraha:

Hadal uu soo jeediyo, tababaruhu, isaga oo tusalaynaya muhiimadda ah in mudanuhu noqdo, hawl-yarsire. Adigoo xogta ka soo dhiraandhirinaya curis yadan hore, waayo- aragnimaddeeda ku lug leh, sida golaha deegaanku uga dhigi lahaayeen mid luxdoon ee shirarkooda u noqon lahaa mid wafajo ka soo baxdo, mid dhiirigeli yaa iskaashiga xalaha guddi kooxeedka golaha ay ugu caawin lahayd xalka khilaafaadka loona soo afjari lahaa isafgarran waaga ka dhaxdhaca bulshada iyo ka golaha deegaankaba. (30 daqiiqo)

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

### 5.3 Tasmada dhaqanka Fududeeyaha:

Ka-qayb-galayaashu waxa ay isbarbardhiga doonaan natiijadda uu qof kasta soo gudbiyey isagoo ku dhererinaya dabecada runta ah ee hawl-yareyaasha iyo tan ay doorbideen dabecad ahaan.

Ka dood arrintan habka ugu suurtoogalsan ee lagu buuxin karo wixii fikir ah ee arrintaasi ku saabsan. (45 daqiiqo)

### 5.4 Layli: Ka-shaqaysiinta shirarka:

Ka-qayb-galayaashu, waxa ay qorayaan shaxda liiks shirarka ay ka qaybgaleen, iyagoo ku muujinaya, heer cabirka ee ay ka raali noqdeen, shir kasta iyo in ay ka doodaan, iyadoo ay kooxo tiro-yar isku qaybiyey. Marka ay koox koox kooban ay noqdaan, in ay ka shaqeeyaan, sidii ay ugu muujin lahaayeen in kor loo dhigo tayeynta shirarka.

### 5.5 Layli: Maareynta xiisadaha:

Wada-shaqaynta koox yar yar ama kooban. Ka qaybgalyaashu waxa ay akhriyayaan warqad ka timid xildhibaan ka tirsan golaha, taasoo ay ku jiraan eedaymo, maamul xumo oo loo soo jeedinayo duqa iyo tallo soo jeedinta istaratijiyadeed ee xalinta mushkilad weyn oo ka dhexeysa dad, una keeni karta qarrax ka dhex hura shakhsiyaad (90 daqiiqo).

### 5.6 Door-jilid/diraasad xaaladeed: Madax-bannaanaynta suuqyada:

Ka qaybgalyaashu waxa ay ka qayb qaadanayaan in ay ilaaleyaan ama eegaan, door qaadashadda arrimaha ka jira golaha dexdiisa, kuwaasi oo raacsan masuuliyadda hawl-fududaynta shirarka guudiga loogu baaqay in ay gacan ka geystaan, sida uu urur uga taageeri lahaayeen, sida uu ururkaasi u samayn karo qorshe maamul oo ku lug leh abuurida suuqyada xorta ah ee deegaanka deriska aaga ururkaasi. (105 daqiiqo).

### 5.7 Layli: xirfad gudbin:

Ka qaybgalayaashu, waxa ay muujinayaan, wixii ay ka barten aqoon-is-weydaarsiga, si ay u sameeyaan faallooyin uu mid kasta ku faaqidayo fikirkiisa, si faalladaasi loogu qaato, oo ay uga mid noqoto, arrimaha la isu raacay aqoon-is-weydaarsiga kaddib. (30-45 daqiiqo).

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**



## 5.1 Layli diyaargarow ah: Maxaynu ku samaynaa sibiidhka?

Waqtiga: (30 daqiiqo).

### Ujeeddo:

Layligan waxa lagu muujinayaa ama lagu soo bandhigayaa koboca kartiyeed ee natiijo ahaan ka soo bixi karta marka ay golaha deegaanku iskaashi yeeshaan.

### Hab-raaca:

Qaybi nuqulada warqada uu soo qoray mudane ka mid ah golaha, oo uu u soo diray Duqa magaaladda, taasoo xambaarsan eedaymo badan iyo cabashooyin la xiriiirta sida uu Duqu u qabanayo, hogaamiye iyo ka maareeye ahaan arrimaha golaha.

Maanka ha galiyo mid kasta oo ka tirsan ka qaybgalayaasha, inuu humaagsado, in isaga ama iyada, qof walba oo ka mid ah golaha uu weydiistay duqu, in gooljoog ka noqodo shirka loo qabanayo isaga iyo xildhibaano, waa sida uu dhigay hadalkee, uuna ku yiri, “Iga caawi ilaa xaaladda gunteeda hoos laga gaadho”. U qaybi ilaa 4 ama 5 kooxood oo yar yar. Weydii in koox kasta oo koobani in keento istaraatijadda horumarinta ee xiriira Duqa iyo xildhibaanka, iyadoo u kaxaynaya xaaladda la helo xal maslaxo oo guul iyo guul gayeysiisa labadaba. Ku tallo bixi in ay tixgeliyeen qaar ka mid ah fikradihiin ka sheegay, aaraa soo jeedinta shirka xalinta khilaafaadka. Sii koox yar 30 daqiiqo si ay dhaliyaan istaraatijiyado.

Marka uu wakhtigu dhammaado, dib-u-shir sii ka qaybgalayaasha oo weydii warbixino, una qaybi kooxa yar yar. Isbarbardhig oo dood ka samee istaraatijiyadaha kale duwan.

Warqadda soo socota waxa qoray xildhibaan ka tirsan golaha deegaanka ee magaalo ku taal bariga Yurub, isagoo u soo diray Duqiisa, si uu u tusaaleeyo khasayntiisa dareen, ee sida uu u wado Duqaasi xilkooda dhawaan, kaddib markii Duqa iyo golaha xilaalka iyo xafiiska loo dhaariyey, taasoo abuurtay xaalado khilaaf oo samayn shakhsiyadeed oo dhexdooda ah keentay.

### Xaalada

Bal ka soo qaad in uu ku la socodsiiyey xoghayaha duqa magaaladu, in ay degmadu haysato fursad ku saabsan 1200 oo kilos (12 mitirik tan) oo sibiidh ah, oo lagu siinayo bilaash. Waxa ay ku jiraan 480 kiish oo miisaan koodu yahay 25 kios midkiiba. Baagyadda sibiidhkaasi, waxa laga soo badbaadiyey markab quusay, waxana la soo saaray Doon yar oo ganacsi oo ay magaaladu leedahay.

Maamulha doonta yar ayaa diyaar u ah, in kaalmo looga dhigu, sibiidhka magaaladda, haddii ugu qancin karo in sibiidhka lau fullin doono iskticmaalka danta guud ee ummadda.

Ku fuli dhow daqiiqo, ka firfir, arrinta mushkaladda kaddbna ku qor waraaq cad, siyaabaha fara badan ee sibiidhka loogu adeegsan karo dana guud ee ummadda.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

---

---

---

---

## 5.2 Qoraalka Tababaraha

**Waqtiga: 30 daqiiqo**

### **Ujeeddo**

Soo jeedintaasi waxa ay u koddhaysaa ka qaybgalayaasha fikrad iyo aragtiyo ku lug leh xaga hawlfududeynta iyo hawl fududeeyaha, kaalintiisa iyo dulucda ay ku fadhido uga faa'iidaysiga aqoon-is-weydaarsiga qof kasta oo awoon-is-weydaarsiga ku jira iyo layli kooxeedyadda lagaga hadlayo aqoon-is-weydaarsiga arrintan la xiriira.

### **Hab-raaca:**

Diyaarinta, soo jeedin cashar uu xogtiisa ku salaysan tahay curiska hore ee kaalinta fududeeyaha. Si gaar ah, u qeex sida ay xildhibaanadda deegaanku u diyaarin lahaayeen xirfadooda si ay shirka ugu adeegsadaan inuu noqdo mid waxtar leh, ayna u dhiirigeliyaan iskaashiga dhexmara dhammaan xubnaha deegaanka ama ay u caawin lahaayeen xalinta khilaafka bulshadda iyo golaha deegaanka dhexdiisa.

Wararka mid, mid xogtooda loo qeexay ee kaadhadhka ku qoran, ayaa kaa caawin kara, sida aad wararkaaga ugu dhammaystiri lahayd si nidaamsan oo jadwalka waafaqsan. Marka kasta, su'aallo weydii ka qaybgalayaasha inta aad wadid ama ku dhexjirto soojeedintasi aad u hubiso, ammuurta aad ka hadlayso, si ay u la socdaan, una xiiso geliso ama u soo jiidato. Waxa haboon in aad adeegsato, cashir kabayaal, sida sawir, maqal, muuqaal, iyo wixii la mid ah, oo ay ku jiraan xaashiyo daabacan oo cashirka lagu diyaariyey, si ay ugu fududeeyaan fahamka soo jeedinta.

## 5.3 Tijaabo: Tasmada Dhaqanka Fududeeyaha

**Waqtiga: 45 daqiiqo**

### **Ujeeddo:**

xeeladaha layligan oo kale loo adeegsado, waxa uu qiimo u leeyahay xiriirka ka dhexeeya dulucda arrimaha lagaga doodayo aqoon-is-weydaarsiga iyo waayo-aragnimadda runta ah ee ay hore u lahaayeen ka qaybgalayaashu marka ay dhammeeyaan ka qaybgalayaashu hawlaha aqoon-is-weydaarsiga ayna gartaan hababka looga baahan yahay in ay run ahaan ugu dhaqmaan, wax yaabaha ay fuliyaan, ayaa noqonaysa, kuwo muhim ah oo ku haboon shaqadda ay xildhibaanadda goluhu hayaan.

**X/dhibaan  
ka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Ujeedada xeeladani waxa ay tahay in ay ka qaybgalayaasha ka caawiso in ay si run ah u noqdaan hawlfududeeyayaal, uguna doortaan ama xushaan hadba hab dhaqanka ku haboon inuu u adeegsado hawshiis.

### **Hab-raaca:**

U qaybi ka qaybgalayaasha nuquladda qoraalka ku saabsan qaababka dhaqan ee hawlgalka fududeeyaha. Weydii markaasi, ka qaybgalayaasha in ay buuxiyaan qaab dhaqanka hawlfuulneed ee fududeeyaha uu adeegsanayo, isagoo raacaya tilmaamo. Haddaba, marka ay dhammeeyaan, shaqadda qoraalka sheegaya noocyada dabeecadaha hawlqabasho, ee looga baahan yahay hawlfududeeyaha, weydii labo ama saddex ka mid ah noocyadda hawlgal dhaqameed ee fududeeyaha ee aanay weli gabahoodu hore u adeegsan, laakiin ay haatan u arkaan in ay hawshooda waxtar u yeelan karaan, marka mustaqbalka lagu xisaabtamo.

Weydii ka qaybgalayaasha in ay goobaab geliyaan hab dhaqanka ay soo xusheen ama door bideen. Haddaba iyaga oo adeegsanaya xaashida casherka ee ku taal bogga soo socda ee la xiriira xaaladaha hawlgalka xidhibaanka, weydii ka qaybgalayaasha inay ka fekiraan oo ay qoraan qoddob ama laba ficil oo gaara oo ay doonayaan in ay fuliyaan dhawrka maalmood ee soo socda kuwaasi, oo ay u adeegsanayaan xeeladaha iyo hab dhaqan hawlgal ee dabeecadaha fududeeyaha ee lagu baray aqoon-is-weydaarsiga weydii oo ka codso tababarayaal soo qora layigan.

### **Dabeecadaha diyaarsan ee fududeeyaha**

#### **Awaamiirta**

Mid kasta oo ka mid ah 14 ka bayaan ee ka mid ka ah xeeladaha diyaarsan ee hab dhaqanka fududeeyaha waxa ay sida caadiga ah ku lugleeyihiin kaalinta fududeeyaha ee shaqadda golaha deegaanka. Akhri bayaan kasta. Go'aanso dabeecadaha dhabta ah ee hab dhaqan kaaga fududeeyanimu ku sargoan tahay bayaannadda, ils markaasina qor jawaabahaaga adiga oo hubinaya, ta ku haboon afarta sanduuq ee lagu siiyey. Haddaba, waxa aad buuxisay habdhaqankii diyaarsanaa ee fududeeyaha marka aad hubiso jawaab kasta oo aad ku buuxisay 14ka bayaan. Midna ha ka tegin, bayaannadda adiga oo aan ka jawaabin.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Fududeeye	Mar naba	Dhif	Mar mar	Inta badan	Had & jeer
1.	Hore ayaan u sii oгаа waxa la iga filayo ka hor inta aanan shirka tagin				
2.	Waxa aan ka taageerayaa kaqeygalayaasha la socodka inta badan natiijooyinka uga soo bixi kara shirka				
3.	Waxaan ku dadaalay caawinta inta la dhiso oo aan la joogteeyo xidhiidh wacan oon la yeesho xubnaha kale ee shirka ka qeybgalayasha				
4.	Waxa aan ku dhiirigalinayaa xubnaha kale iney yeeshaan dareen cad oo u sahla qaabka uu shirku u socdo				
5.	Waxaan xogagaal u ahay natiijooyinka aan doonayo inay ku soo baxaan dadaalkii shirka aan geliyey si uu midho dhal u noqdo				
6.	Waxaan ogahay oo aan ka qeybqaatay kaalintii gaarka ahayd ee ugu habooneyd aqoontayada oo aan kala qeybqaatay xubnaha kale ee aanu wada shaqeyno				
7.	Si xaqiiqada ku fadhida ayaa aan u dhegeystaa xubnaha kale, waxaanaan la socdaa go'aminta (judgement) ila iyo inta aan ka wada ogaanayo dhammaan fikradaha aan soo jeedinayo				
8.	Waxaan u darbanahay firfircoonaanta, daacadnimada iyo isaaminaada wada xidhiidha ee xubnaha kale.				
9.	Waxaan keenaa tallo soo jeedin miqiyaas u noqon karta qiimeynta tayada shaqadu ugu socoto shirka				
10.	Waxaan joogteeyaa wada hadalka dadka bulshada ee loo adeegayao. Si aan uga hello taageero iyo ansixinba				
11.	Waxaan ku xisaabtamaa in wakhti kasta aqoontayada iyo waayo-aragnimadayadu u baahantahay kaalmeynta hogaamineed				
12.	Waxaan ku dadaalaa inaan ishortaago kala qeybsanaanta waxaana aan u dheggonuglaadaa fikradaha xubnaha kale, waxaan aan ka fogaadaa canaanta				
13.	Waxaan gacan ku siiyaa dhinacyada iska soo horjeeda sidii ay u gaadhi lahaayeenislaax labada dhinacba raaligeliya				
14.	Waxaan raacaa hab nidaamsan oo laga raadiyo laguna wada shaqeeyo si loo hello xalka mashakilka				

**X/dhibaanka deegaanku markuu yahay Fududeeye**

**Tababarka hoggaanka la soo doorto**

### **Qoraalka ka-qayb-galaha:**

Habdhaqanka fududeeyaha ee aan ogaaday in ficil ahaan kor loo qaaday waxa ka mid ah:

1. \_\_\_\_\_
2. \_\_\_\_\_
3. \_\_\_\_\_

waxa ay yihiin qaar ka mid ah ficilada aan maskaxda ku hayo ee ka mid ah habdhaqanada si aad ah fududeeyuhu kaalintiisa uu uga adeegsan karo hawlaha golaha waxa ka mid ah:

**Wax-qabad**

**Wax-qabad**

**Wax-qabad**

### **5.4 Leyli: Ka-shaqaysiinta shirarka**

**Waqtiga: 75-90 daqiiqadood**

**Ujeeddo**

Leyligan waxa uu uga dhiganyahay ka qeybgalayaasha inay ku qiyaasaan heerka ay hadda ka marayaan meelmarina hawlaha shirka ee ay ka qeybgelayaan iyo sidii ay u sameyn lahaayeen tallaabooyin qorshe leh oo u suurtagelin kara inay kor u sii qaadaan heerka ay hadda joogaan.

**Hab-raaca:**

Weyddii ka-qayb-galayaasha inay shax ahaan ugu muujaan warqad cad noocyada kala duwan ee shirarka ay ka qeybgaleen muddadii ay ahaayeen golaha deegaanka. U qoondee wakhti shan ama toban daqiiqo ah oo ay ku dhammeystiraan hawshaasi shaxda lagu muujinayo. Dhinaca kale weyddii ka qeybgalayaasha inay ka warbixiyaan wixii ay qoreen, adigoo ay xogta ku ururinayaan dhinaca bidix ee warqada warka lagu daabaco. Sidoo kale waxaad dhinac midig ee warqada ku sawirtaa shaxda heer-qiyaaseedka (eeg tusaalaha hoos ku yaala). Si aad uga maarano inaad wax isku mid ah shirka hal mar wax ka badan qorto, waxaad adeegsan kartaa astaan amaba calaamad amaba wixii kale ee

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

aad istidhaado waa sumad, makraa shirarka isku noocyo ah ay ka war bixiyaan ka qeybgalayaashu.

Noocyada shirarka
1
2
3
4
5

Heerka cabirka				
1	2	3	4	5
1	2	3	4	5
1	2	3	4	5
1	2	3	4	5

U sharax ka qeybgalayaasha inaad heer-qiyeedka dhinaca midig ee warqada daabacaada loo adeegsaday qiyaasta heerka ay kaga raaliyihiin shirarka ay ka warbixinayeen iyo in dhinaca bidix ee xaashidaasi lagu muujiyo (qiyaasa kala ah in tirada 5= ay tahay ta ugu sareysa ee raaligelinta ama meel-marka shirka, iyadoo 1= agtahay ta ugu horeysa ee xagga ka midho-dhalinta shirka). Haddaba sharaxadaasi ka dib, weydii ka qeybgalayaasha inay soo saaraan iyagoo saaraya summad ama calaamad mid kasta tirada ay ku kala gedisanyihiin shirarka ay ka qeybgaleen, marka loo eego isbarbardhiga heerka ay kaga raaliga yihiin shirarkan oo kale.

Haddaba marka ay dhammeeyaan ka qeybgalayaashu qiyaasahoodaasi shax ku muuji natiijooyinka. Soo saar shirarka lagu tusay qiyaasa ugu horeeya oo diiwaangelinta natiijada. U dir shirarka uga midho-dhal horeeyey dhawr kooxood oo koobkooban oo ka mid ah, ka qeybgalayaasha oo weydii kooxahaasi inay ka jawaabaan laba su'aalood oo ku saabsan shirarkaasi loo doortay.

1. Maxay ahayd arrinta ugu weyneyd ee aad ku saluugtay shirarkaasi?
2. Sidee haddba loo helli karaa hab kor loogu qaado midho-dhalka shirka.

30-45 daqiiqadood ka dib ka codso ka qeybgalayaasha inay dib u shiraan ayna warbixin ka soo gudbiyaan natiijada fadhiga dib looga shiray dood.

## 5.5 Leyli: Maaraynta xiisadaha

### Waqtiga: 90 daqiiqadood

#### Ujeedo:

Khilaafdku waxa ay ka abuurmeen dadka oo xaqiiqada si kala duwan u arka. Marmarka qaarkood sababaha saldhiga u ah ee keena khilaafaadka waa kala taganaanta dadka ee xagga fikradaha, iyada oo uu midba si u arko waxa muhiim ah. Dhinac kala waxa lagu kala duwanyahay xaqiiqada xaaladaasi ka jirta, iyo kala duwanaanta sababata ay arrimuhu sida ay u yaalaan amaba u jiraan. Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa “ nin walba qumanihiisaa qoorta loo sudhay”. Arrintu si kastaba ha ahaatee marka uu khilaafkaasi uu iska keeno hor keeno in aynu gaadho wixii aynu dooneyney waxa ay natiijadeedu noqoneysaa khilaaf dhaca. Khilaafka waxa lagu maareyn karaa in khilaafka la soo bandhigo, lagana wada doodo, jawi furan oo si macquul ah oo isla markaana uga xor ah wax colaada.

X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye

Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto

Layligani waxa uu kordhin karaa ka qeybgalayaashu inay fursad u helaan sidii ay u qorshayn lahaayeen ficil waxtar leh oo u horseedi kara iney xal u helaan khilaaf weyna oo wax dhummin kara oo dad ka dhexeeya.

#### **Hab-raaca:**

Qeybi nuquladda warqadda uu soo qoray mudane ka tirsan golaha degaanka oo sidda fariin eedeynno iyo cabasho badani ay ku jiraan oo uu u soo qoray duqa magaalada, taasoo la xidhiidha habdhaqan duqa ka hogaamiye iyo maareeye ahaan hawlaha golaha ee adeega ummadda.

Qof waliba maanka ha geliyo inuu duqa magaaladu weydiistay iney goobjoog ka noqdaan shir dhexmara mudanaha khilaafku ka dhexeeyo iyo duqa, iyada oo uu duqa leeyahay, “waar bal arrinta ila fiiriya.”

U qeybi ila 4 ama 5 kooxood oo koobkooban. U soo jeedi in ay u fiirsadaan fikradihii ay ku soo arkeen soojeedinta xallinta xiisadaha. Si koox kasta oo yar 30 daqiiqo si ay u soo saaraan istiraatajyada xiisada.

#### **Fiiro gaar ah:**

Warqada soo socota waxa qoray xildhibaan ka tirsan golaha deegaanka ee magaallo ku taala bariga Yurub, waxaana uu u diray duqa magaaladaasi, isaga oo ka cadaynaya warqada dareenkiisa hab-dhaqanka duqa ee xagga shaqada waxa yar ka dib markii loo dhaariyo xafiiska labadoodana ka dhex aloosmay khilaafka xaajadaasi.

### **Summad-warqadeedka Hay'adda**

Mudane Duqa,

**Markii aan talaatadii, 19kii May ku soo qoray warqada sheegaysay diidmadayda ku saabsan dhowr arrimooda oo ka soo baxay shirkii ugu dambeeyey ee aan yeelano ma aan fileyn inay waraaq kale deg deg kuuga soo dirayo, kuuga aanan soo dirin in aan ku hambalyeeyo balse waxaan kuugu soo diray inaan kuu muujiyo dareenkayga ku lug leh ixtiraam la'aantaada sharciga iyo hawlaha xilka golaha deegaanka.**

Ugu horeyn waxa aan halkan kuugu soo ururiyey xaqiiqadeeda:

Arbacadii 20kii May waxa aynu joogney hoolka magaalada 5tii galabnimo – maalin ka hor waxa la nagu casuumay naadiga golaha deegaanka oo taleefon noogu baaqay, laakiin nuxurka shirkana looma sii sheegin.

Shirkaa ka bacdi waxa aanu ka war helay in hay'ada wakiilka ka ah qorshaha magaalaynta loo diray warqad askhkato ah (waxa ay sharcigana ahayd in saddex cisho ka hor nala wargeliyo shirka hortii. Wax ay ahayd in aynu dood ka yeelano mashruuca barxadda basaska mashruucan waxa uu ku lug leeyahay in is-weydiin muddan oo ku saabsan warbixinta shaqaalaha farsamada ee maamulka.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye  
  
Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Waxyaabaha aan diidanahay waxay kala yihiin:

- a) Waxa lanaga filayey in aan u helno saddex cisho ka hor wakiilka shirka, taasina maanaan helin.
- b) Ma siddo sababo ku filan oo macquul ka dhigaya qaabka loo raacay shirka deg deg ah ee golaha.
- c) Ma siddo jaangoonta loo xulay ee qaab dhismdka mashruuca oo loo dhigay markii ugu horaysay ee 18 May ee shirka, si aan ugu qaadano in ay tahay raad raac mashruuc lagu bixin karo.

Waxba kama ogin in aad horeyba u xulatay xalal kale oo sidaa ka duwan.

- d) Warbixintu waxay sididaa dhowr fikradoo oo ku saabsan sida qandaraasyadda loo fiddiyo ama bixiyo oo aan si cad loo faahfaahin. Waxa aan dhammaateen ognahay in kooban bannaan oo ganacsi yar yihiin, waxana ka jira dalab sare ah oo baahiyeed iyo maamulka duqa oo raadinaya siyaabaha kala duwan ee uu lacag saa'id ah ku heli lahaa. Waa kuma qofka loo qoondeeyo inuu go'aan ka gaaro, iyo waliba hannaankeeda ayaa loo raacayee, si go'aan looga gaadho?

Haddaba ayaa mashruucan hogaaminaya maxa se ay yihiin shuruudaha lagu xidhayo in go'aan laga gaadho? Maxaa aan mushkilada ugaga hadli weyney golaha dhexdiisa? Haddii qollad nala fahamsiiyey, sidaa ayaa aanu ku ogaan karaa, sida uu u dhacay codsiga qandaraaska mashruuca? Haddaba waxay aniga ila tahay in xaajada salkeedu yahay, in ay ku qumantahay sidan soo socota:

1. In golaha deegaanka ee cusubi yahay mid fadhiida ah.
2. Isla socodsiinta wararka ayaa ficil ahaan maqan, waxana beddeshay warar ku-tidhi-ku-teen ah.
3. Nidaamka golaha la ma raacin in kasta oo aad in badan isticmaashay arrinta ah "la jiiifiyaana bannaan" mabda sharciga, ama la laali karo sharciga haddii loo baahdo.

Waxa ay ila tahay inay ixtiraam la'aan tahay ku wajaha golaha deegaanka iyo hawshiisa, waxa aanaad doonaysaa inaad noo adeegsato hawlaha oo keliya.

Fadlan ogow diidmadaydu maaha, dagaal shakhsi ah ee waa mid mabda ah. Ma doonayo in aan ishortaago hoolka magaalada. Waxaan aaminsanahay awoodaad, waxaan u haystaa in uu is afgarnwaageenu yahay mid mabda ah ama la xidhiidha qaab kashaqada loo qabanyo.

Ma aha is-hortaagid la is-hortaago hawlaha, ku socda xafiiska duqa, waayo maalmahan, way buuq badan yihiin, sida xuna isla markaa waa loo maamulay. Waa shaqadaada inaad maamusho. Xooghaya hoolka magaalada ayaa ogaan doona sharciyada ay hawlaha aad wadaa ay ku fadhiyaan. Go'aanadaadu waa inay ka duulaan xaqiiqada magaalada ka jirta, balse aanaad ka soo qorrin sharciga oo qudha.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Waxa laga yaabaa in sabir daraantaada aad ku xalli weydo mashaakilka iyo in aad sameyn waydo isbedello ay ku geyeysiisay inaad cadho badan-naatid ood neerfas noqotid! Waxa a an ogsoonahay inay ka badan codsiyo lagun soo qortay, iyo mashaakil xillin u baahan, dacwaddo ku soo gaadhaya iyo tallo-bixino dad



qaarkood ka imanaya, iwm. Laakiinse waxaan rumaysanahay inaad leedahay firfircoonaan iyo garasho aad si sax ah ugu maareyso xaaladaasi.

Ma doonayo in aan u muuqdo qof naqdi kaliye isla soo mutaxa balse waxa aan raacinayaa dhowr fikradood oo tallo soo jeedin ahi.

1. Habbe shaxda sidaa ay u kala muhiimsan yihiin baahiyaha ugu horeeya ee shaqadda golaha ee sanadkan ee yoolka ah, adigoo ku tallo gal ku samaynaya mushkiladdaha deg dega ah ee isku soo dhaca.
2. Sammee jadwalka hawlaha lagu gaarayo hadafkaasi
3. Sammee nidaam lagu qiimeeyo hawlahaaga.
4. Abaabul sida ugu dhakhso badan ee suurtagal ah ee ku saabsan nidaam aad bulshadda ugu wargelinayso hawlaha ka socoda hooka naadiga golaha ee caasimadda ah oo lagu kala war qaato si aan uga doodno si degan oo furan arrimaha ku saabsan ma'baadiida hawlaha siyaasadeed ee dawladda hoose.
5. Wargeli dhammaan iyadoo uu ku jiro guddoomiyaha guddiga wakiilka uga ah golaha deegaanka arrimaha magaalaynta, arrinta looga doodi doono shirarkooda.
6. Hadii uu qaabka uu isku raacay golaha deegaanku kuula muuqdo mid raagaya ha iloobin marka horaba in ay jiraan dhibaatooyin arintaa ku aadan. Ma aha arin wakhtigeedii tagay in la soo jeediyo qaab la raaco xaaladaha deg dega ah. Hasa ahaatee ha iloobin in ay xaaladaha deg dega ah la socdaan asbaabo caddaynaya. Waxanse kaaga digayaa in shirarka xaalada deg deg ee mustaqbalka dhaw la raaci doono si sharciga u waafaqaan.
7. Markasta oo ay kuu suurtagasho u sheeg shaqaalahaaga shaqadooda la xidhiidha in tixgelin iyo ixtiraam ( ay siiyaan) dadweynaha. Awooda shaqaalaha joogtada ah waxa sal u ah karti iyo hufnaan ee sal uma aha diktaatooriyada iyo mucangagnimo.
8. Ha iloobin in aad siyaasi tahay. Afarta sanadood ee soo socda waxad qeexi doontaa siyaasadda maamul ee magaalada. Ma tihid qof shaqaale caadi ah oo xafiis fadhiga ee waxad tahay hogaamiye ka mas'uul ah oofinta balanqaadyadii aad ka gashay dadkii ku doortay.

Waxa aan ku soo gunaanadayaa warqadan iyada oo aanan helin sidii ay weli naftaydu ku raali noqon lahayd waayo waxa aan u malaynayaa inaan si ku fillan isku caddeyn. Hase yeeshee waxa aan ogahay inaanay suurtagal ahayn in la faafiyo ama la caddeeyo mushkilad halis ah, sida hawlaha joogtada ah ee duq magaallo iyo hawlaha golaha deegaanka ee la doortay, qoraal waraaq la soo diray.

Sida awgeed tallo-soo-jeedintayadu kama dambeysta ahi waxa ila quman in aan yeelano shirar xilli-xilli waxa laga yaabaa in deganaansho la'aantaada la xidhiidha aad damacsan tahay in aad mushkiladdo badan ood xilsho ay kiciso neerfayaasha ama madax farad kugu riday! Waxa aan ognahay in aad u dheggonugushahay codsiyadda, mushkiladdaha, ccabashooyinka iyo tallo-soo-jeedinta. Hadda waxa aanu rumeysanahay in aad leedahay garrasho iyo tamar aad ku maareyso sidii aad u sixi lahayd xaaladda.

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

## **5.6 Door–jilid/Diraasad xaaladeed: MADAX-BANNAANAYNTA SUUQYADA**

**Waqtiga: 105 daqiiqo**

### **Ujeeddo:**

Waxa la diyaarinayaa ka qeybgalayaashu fursad ay ugu adeegsadaan xirfadada hawl-fududeeye, si ay la –taliyayaal ugu noqodaan hayadaha bulshadda, si ay taasi ugu suurtoogeliso hayadahaasi in ay u dadaal-galaan si ay masuuliyad weyn ugu hantaan maareynta sayladda deriskooda ah.

### **Hab-raaca:**

Weydii shan ka mid ah ka qaybgalayaasha qaon-is-weydaarsiga (ugu yaaraan laba yihiin haween, haddii ay suurtoogal tahay), in ay u tabarucaan door qaadashada iyo xaalad diraaseedka. Marka aad hesho shan tabaruce u sharax in ay guddida jooqta ee ururadda suuqyadda ee Mawandi, ay soo weydiisteen xubin ka mid golaha magaaladda Mawandi, sidii ay samayn lahaayeen Qorshe, lagu ssocodsiinayo suuqyadda deriska.

Sii tabarucayaasha sifaha shaqada iyo kaalinta laga rabo waxa ay yihiin. Kaalin ka mid ah waxa ay tahay in xildhibaankeii ay weydiisteen hogaamiyaha guddigu, inuu ka caawiyo, sidii ay u bilaabi lahaayeen qorshe lagu maareyneyo suuqyadda ururka. Doorarka labaad, waxa uu yahay in hogaamiyaha guddigu (iyadoo la doorbidayo, haweenka qaybgale ah, taasoo aad u taageersan mareynta suuqa) iyo ta seddexaad oo ah in xubin ka mid ah guddiga (qof kale oo haween ah, hadii ay surgical tahay), kaasoo si xoog uga soo horjeeda maareynta suuqyadda ee ururka. Labada kale ee tabaruce, waxay tahay in ay ku shaqeeyaan sidii goobjoogayaal (eeg goobjooge, xaashiyadda shaqalaha hoose), si uu diiwaangeliyo uguna waramo, mar dambe wixii dhacay, marka uu xildhibaankeu la kulmo, xubno ka mid guudiga jooqta.

Sii tabarucayaasha shan daqiiqo oo ay ku akhriyaan xaaladda iyo qeexida door ka qaadashada. Marka ay tabarucayaashu gorfaynayaan hawssha, diyaari miis shan kursi leh, oo ay isticmaali doonaan door-jilayaasha iyo goobjoogayaashu. Bilow shirka, una sheeg kaalin qaatayaasha in ay haystaan 15 daqiiqo oo ay gorfeeyaan, sida uu ururku guul ka gaarista hawsha maaraynta suuqyadda. 15ka daqiiqo markay dhammaadaan, weydii kaalin-qaate kasta ee shirka inuu faalloodo shirkii iyo guushii xildhibaankeu ka dhignaa fududeeye. Weydii goobjoogaha warbixino iyo inuu ballaariyo fallaanqeynta, si uu u ugu jiito ka qaybgalayaasha una xiiso geliyo.

**X/dhibaanke  
deegaanke  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

## **Madax-bannaaneynta Suuqyada:**

### **Xagga Xaaladda:**

Golaha Degaanka ee magaalada la jiraa Mawandi, ayaa go'aansaday in ay ka dhigaan kuwo gaar loo leeyahay ama baraafti (private) suuqyadda agagaarkood ah. Haweenka wada suuqyadaasi, ayaa dhawaan isku duba-riday iyadoo ka wakiil ah ururka suuqa Mawandi. Guddi haween, ayaa isku soocay, in ay yihiin guddiga joogtadda ah ee ururka suuqa Mawandi, ayaa ug yimiday golaha deegaanka codsiga la xiriira in la taageero in loo tababaro, sida loo maareyn karo suuqyadda dariska. Waxa ay u sheegeen golaha in ergayga golaha u qaabilsan arrimahaasi oo hore ugu guulaystay dadka ganacsiga suuqyadda maareyntooda in iyagana u abuurto nidaam meel mar ah oo ay kaga miro-dhalin karaan ganacsiga suuqa. Waxa aad ku jirtaa xilligaagii labaad ee aad tahay xubin ka mid ah golaha deegaanka ee magaaladda Mawandi. Waxa aad leedahay muddo ka badan toban sanno oo ah khibrad aad ku aburi karto, kuna wadi karto, inaad ku guulaysato hawlaha ganacsiga yar yar ee magaaladooda. Sidoo kale, waxa aad shakhsi, kalsooni iyo aaminaad ku leh dadka suuqa ganacsiga, oo loo arko inuu ka miro-dhali karo arrintaas. Waxa aad deyaar u tahay inaad ka taageerto ururka arrimaha ganacsiga suuqyada hawlhooda inkasta oo aad ka welwelsan tahay culayska masuuligadaasi.

### **Xildhibaan ka oo nabadayn ku jira:**

Waxaad ku jirtaa xilligaagii labaad ee aad ahayd xubin ka tirsan golaha deegaanka ee magaalada Mawandi. Waxaad leedahay waayo aragnomo gaadhaysa in ka badan 10 sannadood oo gayaysiisay habaynta iyo waditaanka lagu fulinayo hab meel mar ah shaqooyinka yar yar ee ganacsi. Dadka suuqa ganacsiga waxa kuu dhex yaala magac iyo maamuus ay u arkaan inaad tahay qof la aamini karo laguna hallayn karo in uu wadi karo in ay hawluhu si fiican u qabsamaan. Waxaad diyaar u tahay in aad ka taageerto ururada xagga mareynta ganacsiga inkatoo aad ka gaws qaniinsantahay masuuliyaddaasi.

### **Marwo Handy:**

Waxa aad ka wakiil tahay ururka dhawaanta la sameeyey ee suuqa Mawandi. adigoo ka dhigan hogaamiyaheeda joogtada ah, ururka dhawaanta la abuuray suuqyada Mawandi. Waxa aad leedahay khibrad yar oo aad ku maareyso suuq ballaadhan. Waxaana aad ogaatay inaanay midnaba dumarka suuqyada deriska ayaanay sidoo kale lahayn khibradaasi. Intii uu golaha magaaladu uu ku masu'ulka ahaa. Waxa aad ku raacsantahay sida danaha suuqyada loo ilaaliyey. Haseyeeshee, u socodka dhinaca madxbannaaneynta ee khusaynta mustaqbalkaaga la xidhiidha, waxa aad qeyb ka ahayd dadaalka lagu abuuray ururka suuqa Mawandi waxa anaad u aragtay in ay tahay xoog dihin oo lagu ilaalinayo xuquuqda dadka leh suuqa Mawandi. Waxa dhowaan lagu dortay hogaamiyaha iyo afhayeenka guddiga joogtada ah kaasoo abuuray inuu ka wakiil noqdo xubnaha ururka. Badankooda xubnaha guddiga joogtada ah wey kula ogolyihiin weyna raacsanyihiin kaalin xoog badan eed adigu ururka ka siin karto maareeyanta suuqyada deriska.

**X/dhibaan ka  
deegaanka  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Haddii kale golaha magaaladda waxa uu qandaraas la geleyaa horumoodka suuqyada. Kaas oo u debcayn baahid iyo danaha ay leeyihiin dumarka wada hawlaha suuqa. Haseyeeshee qaar ka mid ah guddiga iyo gaar ahaan Ms.

Negamon, ma rumaysna ururku inuu awoodi karayo inuu hawl sidaasi u sii baallaadhan karo. Waxa aad u baahantahay in lagu caawiyo waxaana aad tallo ku bixisay in Mr. Makepeace oo ah xildhibaan xubin lagu kalsoon yahaylaguna ixtiraamo magaalada in uu kullaan la yeesho guddiga joogtada ah.

**Marwo Negamon.**

Waxa aad adigu tahay xubin ka mid ah guddiga joogtada ee ururka suuqyada adigoo sannado badana ka shaqeeyey kiosyada suuqyada gaanacsatada ee khudaalayda ee magaalada Mawandi. Marnaba kuma aanad faraxsaneyn sida golaha deegaanku u maamulayey ganacsiga suuqaas, adigoo u riyaaqay markii uu soo baxay go'aanka lagu abuurayo madaxbanaaneynta suuqyadaas. Arrintau si kastaba ha ahaatee waxa aad ka xumaatay markii ay gabadha la yidhaaho Handay ay soo jeedisay in ururku la wareego masuuliyada maamul ee suuqaasi. Waxa aad raacsan tahay in xeeldheere ganacsi oo xirfadle ah madax looga dhigo suuqaa. Waxaad ka cabsiqabtaa inuu ururku u isku deyi doono inuu wado maamulka suuqyada iyagoo ku ganacsan in maareyntu gudiga ee hawshaasi aanay marnaba wadi kari doonin hawshaas. Dhinaca kalena waxaad go'aansatay inaad ishortaagto amaba aad diido dadaalka ay wadaan gabadha la yidhaaho Handy, iyo ergeyga golaha deegaanka ee la yidhaaho Mr. Sammadoon. Wax aad dooneysa in golaha deegaanku qandaraas ku siiyo maamulka suuqyadaasi maareeye madax bananaan amaba hay'ada kale.

**Ms. Middrow,**

Waxa aad haysataa dhowr sannadood sida Ms. Negamonua u waday kioska khudaarta ee mid ka mid ah suuqyada deriskaaga ee saylada Mawandi. Adigoo dhawaan uun lagu magacaabay inaad xubin ka noqoto gudiga joogtada ah ee ganacsiga suuqyada, weli maankaaga kama aanad cabirin sida ugu haboon ee loo mareyn karo maamulka suuqyada ganacsi. Waxaad adigu raacsan tahay fikrada ururka ee maareynta ay tahay in dadkan wada hawsha suuqyada dabagal iyo kontarool lagu sameeyo. Dhinaca kalena waxa cabsi weyni kaa haysaa inaanu ururku u qalmin fulinta hawsha maamulka suuqyada, adigoo ku fekeraya in adeegyadaasi qof xirfadle ah ama kooxiba tallo ahaan ay ku haboon yihiin, waxa aad ka dhu rsugaysa inaad hesho oo aad maqasho fikraddo kala duwan oo arrintaasi lagaga libaaxo iyo qorshe kuu fududeeya inaad arrinkan ka salgaadho go'aamintiisa.

**Xaashida Kormeeraha:**

Aad ugu fiirso waxa ka dhasha shir-xildhibaan, nabadeedka iyo gudiga hogaaminta ururka suuqa, kagana jawaab weydiimaha ku saabsan isdhexgalka meelaha banana ee soo socda.

1. Maxay ahayd ula jeeddada shirka, sidee se loo yidhi ula jeedadani, kumaana yidhi.

---

---

---

---

**X/dhibaan  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

2. Maxay ahaayeen arrimaha ugu mudanaa ee shirka lagaga hadlay, sidee baana loo yidhi?

---

---

---

---

3. Guud ahaan sidee buu nabadeeye shirka u “fududeeyey” amaba uu uga caawiyey inu ku dhammaysto ula jeedadii laga lahaa shirka?

---

---

---

---

4. Intee in le’eg ayaa uu nabadeeye, isaga oo fududeeye ah ku guulaystay doorkiisii? Sharax ka bixi jawaabtaada.

---

---

---

---

5. Maxaa ka sii badan intaa ee uu nabadeeye qaban kari lahaa si uu u sii gaadho natiijo intaasi ka sii midho-dhal badan?

---

---

---

---

### 5.7 Leyli- xirfad-gudbineed

**Waqtiga : 30 – 45 daqiiqadood**

#### **Ujeedo:**

Layligan waxa uu yahay inuu ka caawiyo ka qaybgalayaasha waayo-aragnimaddii ay ka barten agqoon-is-waydaarsiga ayna ku dabaqaan hawshooda ay kaga hoosadaan adduunkooda dhabta ah ee xilka madaxtinimo loogu doortay. Layliga, waxa bartilmaameedkuiisu yahay kordhinta fillitaanada waxqabad, u darbanaanta qorshayn xaqiiqo ku dhisan, iyo qabashadda nidargalkaagii qof ahaaneed. Sida badan shaqada waxa lagu wadaa ku slayn shakhsi fulineed iyo qaar wada-shaqyn shakhsiyado dhexdooda lau agaasimo.

“Garashada iyo qabashada wax weyn baa u dhexeeya.”

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

Waxa guudahaan la isku raacsan yahay, in hadafka tababarku yahay, sida loo horumarin lahaa habka dadku waxqabadkooda, ay uga dhigi lahaayeen mid hannaan fiican ku socda. Sida ay xaqiiqadu tahay, guusha waayo-aragnimada tababarka, waxa looga qiyaas qaadan karaa, inta kobaca qofnimo leeg tahay, iyo isbedelka uu ku keeno inta tababrku socdo iyo kaddib marka uu tababrku dhammaado.

Tababarku raad aan wax ku ool ahayn ayuu ku yeelanayaa kaqaybgaleyaasha aqoon-is-weydaarsiga marka loo eeg rajadda tababarayaasha ay ku wadaan in ku yeesho, gaar ahaan ka dib marka waxooga saacado ah laga joogo u soo bandhigida duruusta. Wakhtiga dar dar gelinta, waa uu sii shiiqaa si deg deg ah ama yaraadaa. Marka la tababaruhu wajaho carinta caadooyinka duugoobay ee shaqada iyo iska caabiga kuwa ay shaqada wadaagaan ee aan la qaybsan ama la wadaagin waayo-aragnimadda aqoon-is-waydaarsiga.

Dhinaca kale, ka laabasho la'aanta nidar-gal-fulinta waxbarasho iyo isbedel ee uu qaaday xiritaankii aqoon-is-waydaarsiga, ayaa ka caawin kara ka qaybgalayaasha in ay kaga gudbaan carinta waxbarashada naftooda iyo carqabadaha deegaanka shaqada. Tababruhu, waxa uu ku caawin karaa la-tababarayaasha inay guul kala gudbaan ku gurka ku wajahan adduunka waxbarasho iyo kan hawlqabasho, isagoo siiya waxooga yar oo qorshayn layliyo fudud ah. Ugu fikir taasi, habkan. Wakhtiga lagu qaato, ku dhiirigelinta aqoon ku shaqaynta, waxa ay noqon kartaa faraqa u dhexeeya, waxbarasho muujin kooban, oo ay ku jirto afkaaro xiiso leh iyo waayo-aragnimada isbedelka nololeed.

### **Hab-raaca:**

Ka dib gabagebeda shirka, ku qaado saacad inaad ku soo jeediso dareenka ka qeybgalayaasha waxbarashooyin muhiim ah kuna dhiirigeli inay sii tijaabiyaan waxbarashadaasi hawlaha xildhibaanimo ee ay qabtaan.

Marka ay ka qeybgalayaashu dhammeeyaan su'aalaha weydiiso inay si dhakhso ah ula wadaagaan kooxda laba ama saddex shay oo ay rubaan inay si madaxbanaan u qabtaan iyagoo muujinaya doorkii xildhibaanimo iyo fududeeyanimo.

### **Gudbinta waxbarashada weydimo qoran**

Ku qaado waxoogay daqiiqaddo ah sidii ay u muuqan lahaayeen doorka fududeeyuhu, wixii afkaar ee cusubaa ee aad kala kullantay shirka, iyo sidii aad afkaartaasi ka dareentayba. Meelaha madhan ee soo socda, ku qor weedh ama laba aad ku sifeyneyso wax cusub oo aad naftaada ka ogaatay intii uu aqoon-is-weydaarsigu socday.

---

---

---

---

adiga oo ku salaynaya wixii aad naftaada ka baratay iyo suurtagalka badan ee keeni kara isbeddelada ee la hor keenay aqoon-is-weydaarsigan, waa maxay labada ama saddexda shay ee aad rabto inaad si duwan ugu qabatid golahaaga dhexdiisa, adigoo ah fududeeye?

**X/dhibaan  
ka deegaanku  
markuu yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

1. \_\_\_\_\_
2. \_\_\_\_\_
3. \_\_\_\_\_

ugu dambeyn, maxaa caqabaddo ah ee adiga naftaada ama shaqada deegaankaaga ah ee aad filaysaa inaad la kulanto intaad ku dedaalaysid hirgelinta isbeddeladani? Maxaad sameyneysaa si aad meesha uga riixdo amaba aad u yareyso caqabaddahaas?

**Carqalad**

**Ficil carqaladda**

**meesha lagaga saarayo**

- |          |          |
|----------|----------|
| 1. _____ | 1. _____ |
| 2. _____ | 2. _____ |
| 3. _____ | 3. _____ |

**“Haddii aad baran karto, waad qaban kartaa”.**

**X/dhibaanka  
deegaanku  
markuu  
yahay  
Fududeeye**

**Tababarka  
hoggaanka  
la soo doorto**

## **PRIORITY ONE WORDS**

### **ENGLISH**

1. Accountability
2. Action plan
3. Active Listening
4. Alternative
5. Application
6. Assessment
7. Authority
8. Awareness
9. Basic Education
10. Beneficiary
11. Capacity Building
12. Case Study
13. Check list
14. Civic
15. Collaboration.
16. Committee
17. Communicator
18. Community
19. Community Development

### **SOMALI**

- Xisaabtan**
- Xilkaa Saaran yahay
- Qorshe hawleed.**
- Wax-qabad hawleed
- dhegaysi feejigan**
- Dhegaysi Darban
- Dhegaysi Mug leh.
- Kala Doorasho**
- Wax bedeli kara wax kale
- Arji**
- Codsi
- Adeegsi
- Qiyaasid**
- Qiimayn
- Suldada**
- Awood xukun
- **Wacyi-galin**
- Ka war qab
- Wax-barasho Asaasi ah.**
- Dan ku Qabe**
- Ka faa'iidayste
- Kobcin wax Qabad**
- Awood dhisid.
- Daraasad Xaaladeed**
- Liis Hubineed**
- Madani**
- La xiriira magaalo
- muwaadin
- Gacan siin**
- Wada shaqayn
- Is Caawimid
- Guddi**
- Gaarsiye**
- Isgaadhsiye
- Beel**
- Jaaliyad
- Horumarin Beeleed**
- Horumarin Jaaliyadeed



20. Concepts	<b>-Figrado</b>
	-Aragtiyo
21. Conceptual Hat Rack	<b>-Figrada Metalaada Xilaalka</b>
22. Conflict	<b>-Is-qabad/Khilaaf</b>
	- Iska hor imaad
23. Consensus	<b>-Rayi la isku raacay</b>
	Aqbalaad figrad guud
24. Consequently	<b>-Natiijo</b>
	-Cawaaqib
25. Constituency	<b>-Dagaan Doorasho</b>
26. Co-operation	<b>-Iskaashi</b>
	Wada shaqayn
27. Council	<b>Gole</b>
28. Councilor	<b>Xil-dhibaan Degaan</b>
	Xubin ka tirsan Gudiga degaanka
29. Counter productive	<b>-Maax Dumin</b>
	-Lid ku ah.
30. Criteria	<b>-Cabirka wax lagu saleeyo</b>
	Qoddobbo wax lagu saleeyo.
31. Critique	<b>-Wax lagu Saleeyo</b>
32. Decision Maker	<b>-Go'aamiye</b>
33. Definition	<b>-Qeexid.</b>
34. Delegation/Delegate	<b>-Wefti</b>
	-Ergo
35. Democracy	<b>-Demoqraadiyad</b>
36. Description	<b>-Tilmaan</b>
	-Sifo
	-Sharax
37. Dialogue	<b>-Wada Hadal</b>
38. Effective	<b>-Wax ku ool</b>
	-Sidii la rabay wax u tarid.
39. Effective leadership	<b>-Hogaaminta wax ku oolka ah.</b>
40. Efficiency	<b>-Wax qabad fiican leh</b>
41. Elected Leadership	<b>-Hogaaminta la doortay</b>
42. Empower/Empowerment	<b>-Awood siin</b>
	-Awood u fasaxid
43. Enabler/Enable	<b>-Awood siin</b>
	-Karti siin
44. Essay	<b>-Qormo</b>
	-Maqaal
45. Ethical	<b>-Hab-dhaqan</b>

46.Evaluation/Evaluate	<b>-Qiimayn</b>
47. Evaluation Survey	<b>-Qiimayn Sahan</b> -Baaritaan qiimayneed
48.Exercise	<b>-Layli</b>
49.Facilitator	<b>Fududeeye/Sahle</b>
50.Feed back	<b>War Celin</b> Jawaab Celin
51.Financier	<b>-Masuul Maaliyadeed.</b>
52.Gender	<b>-Jandar</b>
53.Goal	<b>-Hadaf</b> -Gool
54.Good Governanace	<b>-Hab Xukun Wanaagsan</b> -Hab Maamul
55.Government	<b>-Xukuumad</b>
56.Group Discussion	<b>-Dood kooxeed</b>
57.Guide	<b>-Tilmaamid</b> -Hage
58.Hand Book	<b>-Tilmaan Bixiye</b> -Tilmaame Bare.
59.Human Resources	<b>-Khayraadka Dadka</b>
60.Human Settlement	<b>-Degsiimooyinka Aadanaha</b> Degaamayn
61.Implementation	<b>-Hirgalin</b> -Fulin
62.Information	<b>-Xog</b> -Wargelin
63. Institution	<b>-Haya'ad</b>
64. Institution Builder	<b>-Haya'ad Dhise</b>
65.Institutionalize	<b>-Haya'deeye</b>
66.Instruction	<b>-Amar</b> -Wax barasho -Wax barid
67.Key Point	<b>-Qoddobbo Muhiim ah.</b> Qoddobbo Ma Dhaafaan ah
68.Leadership Process	<b>-Geedi socod Hoggaamineed</b>
69.Learning	<b>-Barasho</b> -Wax Barasho -Tacliin Barasho
70.Learning Objective	<b>-Ujeeddooyinka Barashada</b> Yoolka Barashada
71.Local Government/Authority	<b>-Dawladda Hoose</b>

72.Majority	<b>-Aqlabiyad</b> -Inta Badan
73.Management Process	<b>-Geedi Socodka Maaraynta</b>
74.Meeting	<b>-Kulan</b> -Shir
75.Minority	<b>-Inta Yar</b> -Laga tiro yar yahay
76. Minutes	<b>-Hadal Qor</b> -Hadal qoraal
77. Mission	<b>-Ergo</b> -Risaalo
78. Monitoring	<b>-La socod</b> -La saan qaad
79. Negotiation/Negotiator	<b>-Wada Xaajood siiye</b> -Wada Hadal siiye -Gorgoriye
80. Networking	<b>-Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya</b>
81.Organization	<b>-Urur</b>
82. Over seer	<b>-Korjooge</b>
83. Over view	<b>-Dulmar/Guud Mar</b>
84. Participants	<b>-Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha</b>
85. Perception	<b>-Faham/Dhugmo/Garasho.</b>
86. Performance	<b>-Waxqabad/Fulin Hawleed.</b>
87. Perspective	<b>-Ka eegid wajio kala duwan.</b>
88. Policy	<b>-Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad</b>
89.Policy Maker	<b>-Siyaasad Dejiye</b>
90. Power Broker	<b>-Awood wax ku qabte/Awood adeegsade</b>
91. presentation	<b>-Soo Bandhigid/Qadimaad</b>
92. Proactive	<b>-Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac</b>
93.Process	<b>-Geedi socod/Socodka</b>
94.Questionnaire	<b>-Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah</b>
95.Quorum	<b>-Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo</b>
96.Rational	<b>-Maan-gal/Macquul</b>
97.Reactive	<b>-Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug</b>

98.Refrance	-Tixraac/Raad raac
99.Reflection	-ilays noqod/Humaag noqod
100.Resources	-Khayraad.
101.Revenue	-Dakhli
102.Role play	-Door-jelid/Door ciyaarid
103.Session	-Fadhi/Kulan
104.Shared Vision	-Aragti wadaag
105.Simple Majority	-Aqlabiyad hal dheeri ah.
106.Simulation	-Iska yeelid/U ekeysiin
107.Slums	-Bul caws/Carshaan/Isku raran
108.Solution	-Furdaamin/Xal
109.Stakeholders	-Daneeyayaal.
110.Strategic Plan	-Qorshe istaratijiyadeed.
111.Strategy	-Istaratijiyad/Tab/xeelad
112.Summary	-Soo koobid/Khulaaso
113. Symptoms	-Astaamo/ Calaamado
114. Systamatic	-Habaysan/Nidaamsan
115.Technique	-Farsamo/Xeelad.
116.Training Design.	<b>Jaanjooyada Tababarka</b> /Naqshadeynta Tababarka
117.Training Material.	-Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka
118.Traing Need assessment.	-Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta Baahida Tababarka
119.Transparency.	-Wax qaris laa'aaan
120.Transparent	-Qof aan waxba qarinnaynin.
121.Unanimous	-Loo dhan yahay/Gedigood.
122.Vision.	-Aragti fog/Aragti dheer
123.Warm up exercise	-Iskulalayn/Qandhicin/Diiran
124.Workshop.	-Aqoon Isweydaarsi.
<b>Priority two words.</b>	
125.Acknowledgment	-Garwaaqsi/Garawsi/Mahad-celin
126.Administrative Fixes.	-Adeegsi
127.Analysis	-Gorfeyn/Falanqeyn/Taxliil.
128.Assignment.	-Shaqo Mucayin ah
129.Assuption	-Maleyn/Si u qaadasho
130.Benchmark	-Bar qiyaaseed/Bartilmameed
131.Challenges	-Caqabad/Loolan/Hardan
132.Collective	-Kooxeed/Urureed/Wadareed

133. Conceptual frame work	- <b>Gadaan-fikradeed/Aasaas fik</b>
134. Constructive	- <b>Wax dhisid/Dhismo-gal</b>
135. Conventional Wisdom	- <b>Xikmad soo jireen ah.</b>
136. Corruption	- <b>Musuq-maasuq/Laaluush.</b>
137. Dilema	- <b>Laba daran mid dooro</b>
138. Diversity	- <b>Kala duwanaan/Kala gedisnaan</b>
139. Encouraging	- <b>Dhiiri-galin/Geesinimo galin.</b>
140. Fundamental	- <b>Asal/Aasaasi.</b>
141. Identification	- <b>Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi.</b>
142. Individual Contribution.	- <b>Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri</b>
143. Infrastructure	- <b>Dhismo-hooseed.</b>
144. Input.	- <b>Wax galin</b>
145. <i>nsight.</i>	- <b>Aragti Maskaxeed.</b>
146. Inspiration.	- <b>Maan-godlin/Ra'yi fiican helid.</b>
147. Interaction.	- <b>Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid.</b>
148. Judgement	- <b>Xukun/Go' aan</b>
149. Land Use Malaise.	- <b>Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa</b>
150. Multipurpose	- <b>Ujeeddo badan/Ujeedooyin kala du</b>
151. Output.	- <b>Wax ka soo saarid.</b>
152. Potential Candidate	- <b>Musharax dihin/Musharax iman kara</b>
153. Pre-training.	- <b>Tababar horaad/Tababar hortii.</b>
154. Priority	- <b>Mudnaan.</b>
155. Problem Solver	<b>Furdaamiye/Xaliye dhib</b>
156. proficiency	- <b>Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh.</b>
157. Public	- <b>Guud</b>
158. Public Sector.	- <b>Qaybta Guud</b>
159. Public Service	- <b>Adeeg guud.</b>
160. Regulation	- <b>Xeer Hoosaad.</b>
161. Self Governance.	- <b>Isxukumid.</b>
162. Self Introduction.	- <b>Is-sheegid/Is-tilmaamid.</b>
163. Self study.	- <b>Isbarid</b>
164. Self Assessment	- <b>Isqiyaasid/Isqiimeyn.</b>
165. Shirinking Resources.	- <b>Khayraadka sii yaranaya</b>
166. Technical	- <b>Farsamo/Farsamayn</b>
167 Training needs.	- <b>Baahi tababar.</b>
<b>Priority three Words</b>	
168. Absolute Poverty	- <b>Saboolnimo</b>
169. Absolute	- <b>Gebi-ahaan/Buuxda.</b>

170.Application Commitments	- <b>Nidar-gal</b> /Daba-qaad ballan
171.Bureaucracies	- <b>Biroqraadiyad</b> /Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172.Caution	- <b>Taxadar</b> /Digniin.
173.Density	- <b>Cufnaan</b> /Jirmiga shega.
174.Environmental Degradation	- <b>Hoos u dhac degaan</b> /Hoos u dhac xaaladda degaanka
175.Equilibrium	- <b>Dheeli-tir</b> /Is-le'eg
176.Hawker	- <b>Ha is wareerin</b> /Dadka badeecada naadiya
177.Implication	- <b>Maldahnaan</b> /Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka.
178.Jurisdiction.	- <b>Haya'addaha Garsoorka.</b>
179.Legal Requirement.	- <b>Baahida Sharciyeed.</b>
180.Legislation.	- <b>Xeer Degin.</b>
181.Legitimate	- <b>Sharci ahaan</b> /Qaanuun ahaan
182.Matchmaker	- <b>Isku aadiye wax isku habboon</b>
183.Misinterpretation	- <b>Fasiraad xumo</b> /Fasiraad qaldan
184.Off-spring	- <b>Farac.</b>
185.Optimistic	- <b>Samo-filasho</b> /Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg
186.Partnership	- <b>Wadaag</b> /Wada lahaansho.
187.Pessimistic	- <b>Xumo arag</b> /Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg
188.Phenomina	- <b>Ifafaalayaal.</b>
189.Professional	- <b>Xirfadle</b> /Xeel-dheeri
190.Recycle	- <b>Sameyn celin</b> /Dib u nacfi galin
191.Rules.	- <b>Qawaaniin</b> /Xeer
192.Status Quo	- <b>Xaalad taagan</b>
193.Stimulation.	- <b>Xiiso galin</b> /Fi-fircooni galin.
194.To Wear different Hats.	- <b>Xilqaad badnaan</b> /Kaalimokala duwan qaa
195.Waterpolution.	- <b>Dikhaw Biyood</b> /Wasakhaw Biyood/Dhiiq
196.Facilitator	- <b>Fududeeye</b>
197.Financier	- <b>Masuul Maaliyadeed</b>
198.Gender	- <b>Jandar</b>
199.Negotiator	- <b>Wada hadal siiye.</b>
200.Overseer	- <b>Korjooge.</b>
201.Policy Maker	- <b>Siyaasad dejiye</b>
202.Power Broker	- <b>Awood wax ku Qabte.</b>

203.Institution Builder

**-Haya'ad dhise**

204.Leader

**-Hogaamiye**

205.Leadership

**-Hogaamin**